Sharci L._____ Taariikh_____

Sharciga Batroolka Somaaliyeed

Iyadoo la tixraacayo qodobka 28 iyo 67 ee Axdiga Federaalka kumeel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, Barlamaanka Federaalka ku-meel gaarka ahi wuxuu soo saarayaa sharcigaan oo laga hirgelin doono Jamhuuriyadda Soomaaliya oo idil.

BAABKA I: QAYBAHA GUUD

Qodobka 1
Eray bixin

Marka sharcigaan laga hadlayo, erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha mid walba ku hor qoran:

‘’ **Ruqsad** ” waa u oggolaansho baaris, heshiis Wax-Soo-saar Wadaag ah, oggolaansho isticmaalka dhulka korkiisa, ama heshiis kasta oo ay gasho Dawladdu oo la xiriira oggolaanshaas.

“ **Aagga la Oggolaaday”** waxaa loola jeedaa dhulka ama goobta ruqsadda lagu baxsho goor walba.

“Shakhsiga Ruqsadda la siiyay” waxaa loola jeedaa:

(a) Qandaraaslaha xagga heshiiska Wax- Soo saar Wadaag; iyo
(b) Qofka Ruqsad la siiyey, marka loo eego ruqsad kasta oo kale;

‘**’Muddo Sannadeed’’** waxaa loola jeedaa laba iyo toban bilood oo ka bilaabata 1da Janaayo kuna dhammaata 31da December, ee Miilaadiga.

‘**’Aagga Heshiiska ’’** waxaa loola jeedaa, goobta ruqsadda Heshiis Wax-Soo saar Wadaagga lagu bixiyey;

‘’**Qandraasle**’’ waxaa loola jeedaa shaqsiga Hay’adda Batroolka Soomaliyeed la gashay heshiis wax-Soo-saar Wadaag;

‘**’Kontrool’**’ waxaa loola jeedaa, markii ay shakhsi ku saabsan tahay, awoodda uu leeyahay shaqsi kale, si uu u hanto :

(i) lahaanshaha saami ama awood codeed, oo la xirira shaqsiga hore ama shaqsi kastoo kale; ama
(ii) awood kasta oo ay xambaarsan yihiin qodobada wada lahaanshaha, ama uu nidaminayo dokumenti kasta oo kale oo salka ku haya shaqsiga hore ama

shaqsi kasta oo kale, oo qeexaya arrimaha shaqsiga hore sida loo socodsiinayo, si waafaqsan rabitaanka ama tilmaamaha ee qofkaas kale ;

‘**’Saliid Ceyriin’’** waxaa loola jeedaa macdan saliid aan la sifeyn iyo dhammaan hydrocarbonada dareera ama laga miiray gaaska dabiiciga, iyadoo loo adeegsaday cadaadin ama kala miirid;

‘**’Dib u Furfurid’’** waxaa loola jeedaa, marka laga hadlayo goobtii la bixiyey ama qayb ka mid ah, hadba xaaladdu siday tahay, ka tagis, kala noqosho, wareejin, ka qaadid iyo/ama dudumin dhismo, kaabayaal, iyo wixii rakiban, qalabka ama hantida kale, iyo shaqooyinka kale oo loo adeegsado Hawlaha Batroolka ee goobaha Ruqsada lagu bixiyey, oo lagu nadiifinayo dhulka Ruqsadda lagu bixiyey si looga dhigo mid wanaagsan oo aan khatar lahayn dhawraysana arimaha bii’adda;

“Wanaag ugu Dhaqanka Goobta Saliidda” Waxay leedahy macnaha lagu sheegay qaybta 25.1;

“Dawlad” waaxaa loola jeedaa Dawladda Jamhuuriyadda Soomaaliya, oo ay wakiilo ka yihiin masuuliyiinta amaWasaaradda shaqada ku leh, sida uu go’aamiyo Golaha Wasiirada.

“**Kormeere**” wuxuu leeyahay macnaha lagu sheegay qaybta 28.1;

“**Sharci**” waxaa loola jeedaa Sharciga lagu maamulayo arrimaha Batroolka, sida uu ku soo baxay hortiiba, ama waqti ka waqti, wax loogu daray ama looga badalay.

“**Wasaarad”** waxaa loola jeedaa Wasaaradda hadba masuul Dawladda uga ah dhaqagalinta Sharcigaan, sida ay u dajisay Dawladdu, oo hadda ah Wasaaradda Batroolka iyo Tamarta.

“**Wasiir”** waxaa loola jeedaa Shaqsiga ugu sareeya Wasaaradda, waqti ka waqti, Dawladdana wakiilka uga ah dhaqangalinta Sharcigaan, sida ay sharciyeysay Dawladdu, oo hadda ah Wasiirka Batroolka iyo Tamarta.

“**Gaaska Dabiiciga ah**” waxaa loola jeedaa dhammaan hydrocarbonada gaaska ah iyo kuwa aan la falgalin, oo ay ka mid yihiin gaaska qoyan, gaaska qalalan, gaas ka koreeya saliidda iyo gaaska ka hara, kadib marka hydrocarbonka dareera laga saaro gaaska qoyan, oo aan ahayn Saliidda Ceyriin.

“**Hawl Fuliye”**waxaa loola jeedaa shakhsi idman ama shakhsi kale ee loo magacaabay si idman ama loo cuskaday Heshiis Midayn in uu habeeyo, kormeerana Hawlaha Batroolka;

“ **Barlamaanka**” waxaa loola jeedaa Barlamaanka Dawladda Federaalka KMG ee Soomaaliya ama Barlamaan kasta oo Federal ah oo ku xiga ee la dhiso iyadoo la raacayo Dastuur lagu ansixiyey Afti Dadwayne;

“**Shakhsi”**waxaa loola jeedaa Shirkad ama Hay’ad qaanuuni ah.

“**Batrool”** waxaa loola jeedaa:

(i) hydrocarbon kasta oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere ama adke; ama

(ii) isku jir kasta oo hydrocarbon ah oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gas, dareere, ama adke.

“**Hawlaha Batroolka**” waxaa loola jeedaa hawlo looga danleeyahay in:

(i) lagu sahamiyo batroolka;

(ii) lagu baaro, hormariyo, soo Saaro, iibiyo ama lagu dhoofiyo batroolka; iyo

(iii) lagu dhiso, lagu taago, ama lagu fuliyo dhismooyin, kaabayaal iyo xarumo loo adeegsanayo horumarinta, wax-soosaarka, iyo dhoofinta batroolka, ama dib u habaynta ama kala furfurista dhismo kasta oo ka mid ah kaabayaalka iyo xarumaha;

‘’**Heshiis Wax Soo-saar Wadaag’’** waxaa loola jeedaa heshiis la galay ama lagu tixraacayo qodobka 13aad, taasoo salka ku haysa saamiga qandaraasluhu uu ka helayo Batroolka, kana dhashay fulinta Hawlaha Batroolka, looguna badalayo hawlihii u qabtay;

“**Sarkaal Dawladeed”** waxaa loola jeedaa shaqaalaha madaniga ee dawladda ama shaqsi u dhigma, xubnaha Barlamaanka, Xukuumadda, Garsoorka ama Garyaqaanada guud, ama shaqsi ka tirsan Hay’adda Batroolka Soomaaliyeed;

‘’**Ruqsad baaritaan’’** waxaa loola jeedaa ruqsad la oggolaaday ee ku cad Qodobka 12aad;

‘’**Xeerark**a’’waxaa loola jeedaa xeerar iyo xeer hoosaadyo ay Wasaaraddu, waqti ka waqti, soo saarto ee la xariira maamulka Hawlaha Batrolka, sida ku cad sharcigaan;

‘’**Haro Batrol**” waxaa loola jeedaa bohollo ama ilo ku samaysmay dhulka hoostiisa oo ay ku jiraan kayd ama kaydad kala qaybsan oo badan ee hydarokarboon dabiici ah oo ku qafilan (Saliid iyo/ama gaas) dhagax aan la mari karin iyo/ama haraynayaan biyo xireenno kuwaas oo isaga mid ah cadaadis dabiici ah oo wada kulmiya;

‘’**Qandraasle dawlad Goboleed’’** waxaa loola jeedaa shaqsi ku dhex shaqaynaya sharciyada Soomaaliyeed, oo ay leedahay kontroolkeeda, si toos ah ama dadban, Dawlad ka mid ah dawlad goboleedyada Soomaaliyeed;

‘’**Hay’adda Batroolka Soomaaliyed** (HBS)” waxaa loola jeedaa Hay’ad awood leh oo sharciyeysan, iyadoo la tixraacayo qodobka 8aad;

“**Shirkadda Batroolka Soomaaliyed** (SHBS)” waxaa loola jeedaa shirkad awood leh oo sharciyeysan, iyadoo la tixraacayo qodobka 9aad;

‘**’Ruqsad Isticmaal Dhulka Korkiisa’’** waxaa loola jeedaa oggolaansho isticmaal dhuleed sida ku cad Qodobka 14aad;

‘**’Dhulka Soomaliyeed’’** wuxuu ka kooban yahay dhulka, biyaha iyo hawada oo hoos yimaada madax-banaanida Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, waxaana ku jira xuduudaha badda iyo birriga iyo aagagga dhaqaale, sida ku cad sharciyada laysku raacsanyahay ee caalamiga ah oo Jamhuuriyada Soomaaliyeed xaq u siinaya barista, horumarinta iyo soo saarista khayraadkeeda dabiiciga ah;

‘’**Soomaaliya**’’ waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Soomaaliya; iyo

‘’**Ceel**’’ waxaa loola jeedaa qodid ama daloolin dhulka iyo badda korkooda, looguna tala galay soo-saarid batrool.

Qodobka 2
Ujeedo

Ujeedooyinka sharcigaan waxaa weeye:

2.1 in uu xaqiijiyo xuquuqda madax banaanid Qaranka Soomaaliyeed uu u leeyahay inuu baaro, horumariyo, soo-saaro, ka faa’iidaysto, maareeyana khayraadkiisa Batroolka ee ku jira Badda iyo Berriga;

2.2 in uu oggolaado dadaallada lagu xaqiijinayo baaxadda hantida batroolka ee ku jira Soomaaliya, iyadoo loo samaynayo qaab nidaameed, heshiisyo iyo qaab xisaabeed oggolaanaya sahamin , baaris, horumarin, wax soo-saar iyo suuqgayn batrool kasta oo la helo;

2.3 haddii khayraad batrool laga helo Soomaaliya, waa inuu dal Soomaaliya iyo dadkiisuba ka helanaa manfaca ugu badan oo ka imaanaya horumarinta iyo wax soo-saarka Batroolka;

2.4 inuu hubiyo ilaalinta, kaydinta iyo daryeelka bii’ada inta ay socdaan Hawlaha Batroolku;

2.5 in la dhiirigeliyo lana taageero maalgelinta shisheeye ee dalka soo galaysa, si loo gaaro himilooyinka kale ee Sharcigaan;

2.6 in la dhiso Hay’adda Batroolka Soomaaliyeed oo noqonaysa hay’adda u saaranyahay xilka nidaaminta ee ku wajahan hawlaha batroolka, iyadoo dhaqangalinaysa nidaminta mabaadi’ida sinaanta, furfurnaanta, isxilmarinta, isu-dhuundaloolka iyo kala soocid la’aantaba leh;

2.7 In la dhiso Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed'' oo ah hay'ad kontroolkeeda Dawladdu yeelanayso oo ka qayb qaadanaysa Hawlaha Batroolka ee ka socda gudaha Soomaaliya;

2.8 in loo hogaansamo talaabooyinka dawliga ah si loo xaqiijiyo isu-dhuundalooka ee ku saabsan wax soo-saarka batroolka, iyadoo la xoojinayo mamulka lacageed ee guud iyo isxisaabinta, lana qirayo in maamulidda khayraadka dabiiciga ah ay u dhacayso si faa'iido ugu jirto muwaadinka Soomaaliyeed, xilkeeduna saaranyahay dawladda, iyadoo u maamulaysa si waafaqsan horumarinta danaha qaranka;

2.9 in si siman loo sugo xaqsoorka ay yeelan karaan shaqsiyaadkii qaanuuniga ahaa ee horay u haystay xuquuq baaritaan batrool oo ay ka dhaxleen xukuumaddii Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, intii ka horaysay December 30, 1990;

Qodobka 3
Dhulka Sharcigaan ka Hirgalayo

Sharcigaan wuxuu ka dhaqan galayaa Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya oo idil.

Qodobka 4
Waxa lagu fulinayo sharcigaan

4.1 Sharcigaan waxaa lagu fulinayaa hawlaha batroolka dhinac walba.

4.2 **Macaadinta kale**. Jiritaanka ruqsadeed ee horey uga jirta goob cayiman ma joojin karto ruqsad baaritaan iyo mid wax soo-saar ee ku saabsan macdanta aan ahayn Batroolka, haddii shaqadaasi aysan hor joogsanayn wax qabadka dhabta ah ee Hawlaha Batroolka.

Qodobka 5
Lahaansho Batrool

5.1 **Lahaanshaha Batroolka**. Lahaanshaha iyo hanashada Batroolka ku jira dalka Soomaaliya wuxuu ku salaysan yahay hanti Qarameed oo ay dawladdu gacanta ku haynayso, dadwaynuhuna uu ku aaminteen.

5.2 **Wareejin lahaansho dib u hanasho ka dib**. Shaqsi wuxuu yeelan karaa lahaansho batrool, kaliya ka dib markii si sharci ah loo siiyo ruqsad Heshiis Wax-Soo-saar Wadaag sida ku cad Sharcigaan.

Qodobka 6
Ku Dhaqanka Awoodaha iyo xilalka Wasaaradda iyo Hay'adda

6.1 **Isticmaalka Awoodaha iyo xilalka Shaqo**. Waxaa iska leh Wasaaradda iyo hay'adda (HBS) oo ugu dhaqmaya si waafaqsan sharcigaan iyo xeer

nidaamiyeyaashiisa, ayna ka mid yihiin ruqsadaha lagu bixiyey sharcigaan, sida soo socota:

6.1.1 xaqiijinta habsami u maaraynta khayraadka;

6.1.2 xaqiijinta horumarinta Batroolka si ay u yaraato dhibaataynta bii'ada, loona sugo kobcinta dhaqaalaha, waxna ku kordhinaysa horumarinta fog ee Soomaaliya;

6.1.3 macquulna ah; lana

6.1.4 jaanqaadi karta hab dhaqanka Shaqo wanaag ee hawlaha goobta saliidda;

6.2 Fursad soo Bandhig Cabashooyin. Inta aysan isticmaalin awoodda shaqo, Wasaaradda iyo hay'addu waa inay siiyaan fursad shakhsiyaadka ay dhici karto in arintu saamaysay in ay soo gudbiyaan cabashooyinkooda, kuwaas oo tixgalintooda mudan marka la soo gudbiyo hadday u muuqdaan kuwo gar ah;

Qodobka 7
Hawlaha Wasaaradda Batroolka

7.1 Hawlaha Wasaaradda. Wasaaraddu waxay gudanaysaa shaqooyinka soo socda;

7.1.1 waxay go'aan ka gaaraysaa stratejiyada, qorshooyinka iyo siyaasadaha horumarinta qaybta Batroolka;

7.1.2 waxay soo saaraysaa xeerar ku saabsan maaraynta Hawlaha batroolka, iyadoo raacaysa soo jeedinta HBS, sida ku cad Sharcigaan;

7.1.3 waxay go'aan ka gaaraysaa siyaasadaha iyo hab iskaashiga lala yeelanayo shirkadaha shisheeye, ayna ku jirto ogolaanshaha qaab ruqsadeedka ay soo diyaarisay HBS;

7.1.4 waxay maareynaysaa hannanka loogu bedelayo Heshiiska Wax-Soosaar wadaagga, xuquuqihii ruqsadaha la xariiray oo ay horey u bixisay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, ka hor Disember 30, 1990, sida ku qoran ama lagu xusay qaybta 48.1;

7.1.5 waxay dejinaysaa siyaasadaha lagu dhiirigeliyo ama lagu xakamaynayo dhoofinta batroolka si loo ilaaliyo danaha Soomaaliyeed;

7.1.6 inay la socoto dhaqdhaqaaqa Hawlaha Batroolka ee gudaha Soomaaliya iyo gobolada saaran xuduudaha Soomaaliya;

7.1.7 inay la xaajooto hay'adaha, wasaaradaha iyo waaxyaha u xilsaaran mas'uulkana ka ah xeerarka wadamada deriska ah ee la xariira hawlaha

Batroolka taas oo samayn ku yeelan karta isu gudubka xuduudeed oo ay ka mid tahay Haraha iyo dhuumaha isu gudba oo ay wadaagi karaan dalalka driska ah.

Dawladdu waxay u xilsaari kartaa Wasaaradda shaqo dheeri ah ee la xiriirta nidaaminta iyo la socodka hawlaha batroolka iyo haddiiba ay haboonaato, u kuur galidda arimaha ku saabsan shaqada ay wasaaraddu qabanayso hadba waqtiga la joogo.

7.2 **Sir XajintaWasaaradda**. Marka shaqaalaha Wasaaraddu ay gudanayaan hawlahooda sharciyeysan, waxaa waajib ku ah inay dhawraan xogogaalnimada siraha ganacsi ee shaqsiyaadka iyo shirkadaha oo ay oggaadeen, wasaaradduna ku qanacday in:

7.2.1 bixinta xogtu u keeni karto khasaaro ama faa'ido si toos ah u taabanaysa shakhsiga ugana imaanaysa xilgudashada Wasaaradda, ama dhalin karta inay wax u dhinto shaqsiyaadka la filayo inay tartamaan, ama

7.2.2 xogtu tahay mid maaliyadeed, ganacsi, cilmi ama farsamo oo ka mid ah sirta loo gudbiyey Wasaaradda oo marwalba loo arkaayey mid xajin ka mudan shakhsiga ay sida tooska ah u saamaynayaan hawlaha Wasaaradda, oo iyaduna u aragto in sababta danta shakhsiga ee la ilaalinayo ay muhiim u tahay midda guud oo xajinta mudan.

Qodobka 8
Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed

8.1 **Dhismaha Hay'adda (HBS**). Sharcigaan waxaa lagu dhisay Hay'adda nidaaminaysaa hawlaha batroolka, laguna magacaabo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, hoos imaanaysaa Wasaaradda;

8.2 **Waqtiga Dhismaheeda**. Waxaa la dhisayaa HBS, waxayna awood u leedahay in ay ku dhaqaaqdo gudashada xilkeeda waqtiga ay cayinto dawladdu. Tan iyo waqtigaas, waxaa shaqadeeda iyo awoodeeda sii haynaya waaxda nidaaminta arimaha batroolka ee Wasaaradda. Qodobada kale ee sharcigaan waxaa loo fasiranayaa si sidaan waafaqsan. Dawladdu waxay istaajinaysaa HBS, markay ku qanacdo in batroolka Soomaaliya laga soo saarayo uu dabooli karo kharajka lagu maamulayo hay'adda.

8.3 **Maamulka HBS.** Dawladdu waxay magacaabaysaa guddi maamula Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) oo ka koobnaanaya ugu yaraan shan (5) ugu badnaanna todoba (7) xubnood. Qaab dhismeedka guddigu wuxuu ku salaysnaanayaa (50% + 1) oo loo nisbaynayo hadba tirada la qaato. Guddigu wuxuu haynayaa maamulka ugu yaraan muddo affar sano ah, dawladduna waa ka qaadi kartaa xilkooda hadday galaan xadgudubyo maamul, waqti kasta. Sababaha looga qaadi karo

xilka waxaa ka mid ah, hadday xadgudub u gaystaan faqradda 8.8, ama 8.9. ama aysan buuxin karin shuruudaha xubinimada ee ku qeexan faqradda 8.5;

8.4 Shaqaalaha Hay'adda (HBS). Hoghayaha Guud iyo shaqaalaha kale ee looga baahan yahay habsami u socodka hawlaha hay'adda waxaa magacaabaya guudiga maamulka ee HBS;

8.5 Shuruudaha Guddiga Maamulka. Shakhsiga ka mid ahaanaya guddiga maamulka ee HBS lama magacaabi karo ama looma ogolaan karo xubinimo haddii uusan muwaadin Soomaali ahayn ama uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, rafiiq ganacsi, iwm, oo ku dhexjira hawlaha wax soo-saarka, gaditaanka, iibinta, gudbinta, dhoofinta iyo keenista, iwm, ee la xariira arimaha batroolka ee wadanka ama haysta caddayn, ballanqaad la hubo oo waqtigeedu dheer yahay oo dulsaar cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadaan oo kale;

8.6 Shuruudaha Shaqaalaha. Shaqsiga shaqaalaha ka mid noqonaya lama magaacabi karo ama looma ogolaan karo in uu sifadaas sii haysto haddii uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, la wadaage, iwm, oo ku dhexjira hawlaha wax soo-saarka , gaditaanka, iibinta, gudbinta, isu-gudbinta, dhoofinta, keenista, iwm, ee la xariira hawlaha batroolka ee Soomaaliya ama haysta caddaymo, ballanqaad la hubo oo waqtigeedu dheer yahay oo dulsaar cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadaan oo kale mid la mid ah;

8.7 Guddoomiyaha Hay'adda. Dawladdu waxay u magacaabaysaa shaqsi ka mid ah guddiga maamulka in uu noqdo guddoomiyaha HBS, iyadoo shaqsi kale oo isla guddiga ka mid ah noqonayo guddoomiye ku xigeenka. Guddoomiyahu waa sarkaal madaxeedka ee fulinta hawlaha HBS, wuxuuna kormeer iyo hagitaan ku leeyahay shaqooyinka iyo maamulka shaqaalaha hay'adda. Haddii shaqsiga guddoomoyaha ahi maqanyahay ama uusan awoodi karin in uu waajibkiisa guto ama uu banneeyo jagada uu hayo, guddoomiye ku xigeenka ayaa yeelanaya dhammaan awoodaha iyo xilalka guddoomiyuhu xambaarsanaa.

8.8 Waajibaadka Feejignaanta. Xubnaha iyo shaqaalaha HBS waxay waajibaadkooda u gudanayaan si daacadnimo ku jirto, shaqadoodana waxay u qabanayaan si sharciga waa faqsan oo aan dhinac u xaglin ku jirin kuna dheehantahay runlownimo, iyagoo aan uga faa'iideysanayn jagooyinka ay hayaan in ay ku raadsadaan macaash aan sharciga waafaqsanayn.

8.9 Sirta HBS. Xubnaha guddiga maamulka iyo shaqaalaha HBS waxaa waajib ku ah in ay hawlahooda u qabtaan si sharciga waafaqsan, ilaaniyaana xogta sirta ganacsi ee shaqsiyaadka iyo shirkadaha oo ay xog ogaal u noqdaan, markay HBS ku qanacsantahay in:

8.9.1 faafinta wararka ay u keeni karto, si aan filan waa ahayn, khasaare maadi ah ama faa'iido shaqsiga ay saameeyaan hawlaha hay'adda si toos ah ama ay wax u dhinto heerka tartanka ee shqsiga si macquul ah;

8.9.2 nooca wararku ay yihiin kuwo ku saabsan dhinaca lacagta, ganacsiga, cilmiga ama farsamo oo loogu soo gudbiyey hay'adda xog ahaan, loona arkahayey in ay sir u yihiin shaqsiga ay sida tooska ah u taabanayaan hawlaha HBS, isla markaana hay'addu u aragto in xajinta xogtaas ay ku wayn tahay danaha guud oo dhawrista mudan;

8.10 Xarunta Hay'adda HBS. Xarunta dhexe ee maamulka HBS wuxuu noqonayaa Magaalo Madaxda ama meeshii kale ee wasaaraddu u garato;

8.11 Xafiiska Gobolka ee HBS. Hay'addu waxay xafiis goboleed ku yeelamnaysaa meel kasta oo ay ka socoto shaqada Batroolku;

8.12 Wajibaadka H.B.S. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay nidaaminaysaa Hawlaha Batroolka sida ku cad Sharcigaan ama sharciyada kale ee Soomaaliyeed;

8.13 Hawlaha H.B.S. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay qabanaysaa hawlaha soo socda:

8.13.1 Nidaaminta hawlaha batroolka iyadoo loo marayo habka bixinta, ilaalinta, isbadelka iyo dhaqangalinta ruqsadaha, iyo soo saarista go'aammo, amarro iyo tilmaamo iyadoo la cuskanayo Sharcigaan iyo xeer nidamiyeyaashiisa oo saldhig u ah hawlaha batroolka si waafaqsan oo hoos imaanaysa qodobada isla sharcigaan ku xusan;

8.13.2 Xaqiijinta sifaalaha ashkhaasta ruqsadaha la siiyey, iyadoo aan cidna loo xaglinayn, lana hubinayo in ashkhaastaasi ay ganacsi iyo dhaqaale ahaanna u dhisanyihiin aaminaadna galaan, lehna karti xirfadeed oo ay ku gutaan waajibaadkooda;

8.13.3 Hubinta shaqsiyaadka ruqsadaha la siiyey in ay fulinayaan una hoggaansamayaan sharciyada, go'aamada, amarrada ama tilmaamaha ka soo baxa HBS si waafaqsan sharcigaan;

8.13.4 Darsidda iyo la socodka arimaha la xariira hawlaha batroolka oo Wasaaraddu ka codsatay HBS in ay isha ku hayso, soona gudbiso' waqti ka waqti, warbixinno la xariira arimahaas, talana ka soo jeediso tallaabooyinka hadba loo baahanyahay, iyadoo la eegayo danaha Qaranka ee la xariira ilaalinta iyo horumarinta ee qaybta batroolka.

Dawladdu, iyadoo la raacayo talo soo jeedinta wasaaradda, waxay u xilsaari kartaa HBS xilal dheeri ah oo la xariira nidaaminta, u kuur galidda iyo gacan ku haynta hawlaha batroolka iyo arimihii kale ee la xariira hawlaha hay'adda hadba sidii dan la moodo loona arko in ay habboon tahay.

8.14 Awoodaha HBS. Marka ay hawlaheeda u gudanayso si shaciga waafaqsan HBS

waxay leedahay awoodaha soo socda:

8.14.1 In ay bixiso Ruqsadaha Sahamineed sida waafaqsan qaybta 12.1;

8.14.2 In ay gasho Heshiisyo Wax-Soosaar Wadaag si waafaqsan qaybta 13.1;

8.14.3 In ay bixiso Ruqsado lagu ogolaanayo isticmaalka ku saabsan dhulka korkiisa si waafaqsan qaybta 14.1;

8.14.4 In ay ka cafiso culaysyada ku imaan kara shaqsiga ruqsada haysta si waafaqsan qodobka 23;

8.14.5 In ay wax ka badesho, ama la noqoto ruqsad kasta si waafaqsan Sharcigaan, xeerarka iyo qodobada ruqsadaha la bixiyey;

8.14.6 In ay soo saarto, meel marisana, tilmaamo lagu hubinayo ku dhaqanka ruqsadaha la baxshay;

8.14.7 In ay waydiiso, dhagaysato, go'aanna ka gaarto dhacdo kasta oo ugu muuqata HBS in shakhsi gudan waayo hawl, ama wuxuu farayey Sharcigaan, xeerarka ama Ruqsadaha, go'aannada, amarrda ama tilmaamaha la baxshay iyadoo la tixraacayo sharcigaan iyo xeerarkiisa, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigaan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah;

8.14.8 In ay amarto, ama waydiiso shakhsi kasta in uu sameeyo waqti kasta oo loo cayimo iyo si kasta oo HBS wax ugu sheegto shaqo kasta ama wax kasta oo shakhsigaas laga rabay in uu sameeyo isagoo raacaya Sharcigaan, xeerarka ama sharci, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo waafaqsan sharcigaan ama xeerarka, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigaan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah;

8.14.9 In la uruuriyo wixii xog ah iyadoo la tiigsanaya arimaha kor ku xusan, taasoo ay ku jirto ku waajibinta shakhsi kasta oo ruqsad haysta in uu raaco awaamiirta dhiibista xogta;

8.14.10 In ay qiimayso ciqaabaha ka dhalan kara ku xad gudubka ruqsad, go'aan, amar ama tilmaamo ay bixisay HBS, si waafaqsan baabka (chapter) VII;

8.14.11 In ay la shaqaso si iskaashi leh habeeyayaasha dibadda dalka ka ah, wasaaradaha ama waaxyaha masuulka ka ah nidaaminta hawlaha la xariira dawladaha dariska ah ee ku saabsan hawlaha batroolka ama dhuumaha isaga gudba xuduudaha;

8.14.12 In ay samayso qawaaniin ku salaysan qaybta 8.17 iyo 8.18; iyo

8.14.13 In ay iskeeda ugu dhaqaaqdo baarista, dhagaysiga iyo go'aaminta wax kasta oo sharcigaan iyo xeerarkiisa hoos yimaada, una baahan in la baaro go'aanna laga gaaro;

8.15 **Baaris**. Waxaa waajib ku ah HBS, in ay baarto ama abuurto xaaladdii lagu baari lahaa, si loo hubiyo in lagu xadgudbay qodob ama shardi muhiim u ah ruqsad la baxshay;

8.16 Iskaashiga lala yeelanayo HBS. Marka hay'addu iyo xubnaha guddigeeda maamuleed iyo shaqaaleheeduba gudanayaan waajibaadkooda sharciga ah , shaqsiga ama shirkadda baaritaanka iyo kormeerka lagu samaynayo waa in ay gacan ku siiyaan bixiyaana si hagar la'aan ah dokumintiyada iyo waxyaalaha laga dalbado. Ashkhaastaas iyo shirkadahaas waa in aysan diidin la shaqaynta looga baahan yahay, kana hor imaanin kormeerada iyo baaritaanka, iskuna dayin in ay qariyaan dokumintiyada iyo waxyaalaha aasaasiga ah;

8.17 Shuruucda Hawl Fulinta HBS. Hay'addu waxay dejin kartaa, hadba sida ay ugu muuqato, kadib markay wasaaradda la tashato, wixii lagama maarmaan iyo lama huraanba ah ee la xariira gudashada waajibaadka iyo xilalka oo ay ku jirto soo saaris qawaaniin dalbaya ama reebaya dhaqanka ganacsi qaarkiis oo ku saabsan shaqsi ruqsad haysta iyadoo looga jeedo in la hubiyo habsami u socodka hawlaha qaybta batroolka ee Soomaaliya. HBS waxaa kaliya oo ay samayn karta qawaaniintaas kadib markay la tashato ashkhaasta ruqsada haysta ama shaqsiyado iyo hay'ado ula muuqda in ay wakiilo u yihiin ashkhaas laga yaabo in ay shuruucdu saamayn ku yeeshaan. Shuruucda la soo saarayo oo la xariira isla qaybtaan 8.17 ma yeelan karto saamayn dib ugu laabasho ama wax ka badelid maadi ah xagga qodobada ama shuruudaha ruqsad kasta la xariira.Did ugu laabashada iyo wax ka bedelidda ruqsadaha waxay dhici karaan oo kaliya sida uu qeexayo qodobka 23aad;.

8.18 Xeerarka hab raaca ee HBS. Hay'addu (HBS) waxay samaynaysaa xeerar ku saabsan qaab dhismeedka hay'adda, qaabka dalbashada ruqsooyinka, wakaalashada, cabashooyinka loo soo gudbinayo HBS iyo sida loo qaadayo dacwooyinka la hor keenayo, iyo habka loo qabanayo shaqo kasta ee HBS hor timaada, iyo guud ahaan, sida HBS ay hawlaha u fulinayso, maaraynta arimaheeda gudaha iyo waajibaadka shaqaaleheeda. Markay samaynayso xeerarkaan HBS waxay ku salaysaa mabaadi'da furfurnaanta, qarsoodi la'aanta, la xisaabtanka iyo madax bannaanida;

8.19Warbixin sanadeedka. Markasta oo sanadka dhamaadkiisa la gaaro, lana dhaafin muddo ka badan lix bilood, HBS waxay wasaaradda batroolkaiyo tamarta u soo gudbinaysaa warbixin la xariirta hawl qabadkeedii sannadkii la soo dhaafay;

8.20 Do**cumentiga aan qarsoodiga ahayn.** Hay'adda (HBS) waxay dadwaynaha u soo bandhigaysaa:

8.20.1 qawaaniinta lagu dhisay HBS ee la ku salaysan qaybaaha kala ah 8.17 iyo 8.18;

8.20.2 go'aanada, amarada iyo tilmaamaha HBS;

8.20.3 ciqaabaha ay soo rogtay HBS;

8.20.4 warbixinada guud ee HBS oo ku cad qaybaha 8.18;

8.20.5 qaababka ay foomamku yeelanayaan mid kastoo ka mid ah Ruqsadda Sahaminta, ogolaanshaha dhulka korkiisa ama Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga; iyo

8.20.6 Ruqsooyinka ay bixisay HBS.

8.21 Dawrka Wasaaraddu ku leedahay HBS. Wasaaraddu waxay u jaangoynaysaa HBS siyaasadda guud ee hagaysa hay'adda, xagga wixii la xariira qabashada hawlaheeda si waafaqsan Sharcigaan iyo xeerarka. Siyaasadda hagitaanka ee wasaaraddu jaangoyso waxaa loo faafinayaa si la mid ah qaabka loo faafiyo shuruucda iyo arimaha siyaasadda. Markay HBS fulinayso hawlaheeda si waafaqsan Sharcigaan iyo xeerarka, hay'addu waxay tixgalinaysaa talooyinka iyo tilmaamaha ka soo fula Wasaaradda. Wasaaraddu waa in aysan faragalin ku yeelan shaqo maalmeedka caadiga ah ee ku saabsan gudashada hawlaha HBS;

8.22 Racfaan. Marka laga reebo sida ku cad qaybtaan, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo ay gaartay HBS waa looma noqdaan oo dhamays ah. Racfaan waxaa laga qaadan karaa arrin kasta oo ku saabsan go'aan, amar ama tilmaan uu horay u gaary xafiis goboleedka HBS. Racfaanka waxaa loo qaadan karaa maxkamada sare, marka uu ku saabsan yahay go'aan, amar ama tilmaan ay bixisay HBS kuna saabsan dhinacyada sharciga, xeerarka ama baaxadda masuuliyadeed ama gabood fal uu ku kacay xubin ka mid ah guddiga maamulka oo ka qayb qaatay go'aan gaarista, amar bixinta ama tilmaanta iyo u hoggaansananta qawaaniinta hab raaca hagar la'aaneed ee ku cad qaybta 8.23. Racfaan lagama qaadan karo go'aan kale oo ay HBS gaartay, meel kasta oo uu salka ku hayo. Codsiga Rafcaanka waa in la soo gudbiyaa 60 maalmood gudahood ka dib marka u soo baxo go'aanka, amarka ama tilmaanta laga qaadanayo Racfaanka.

8.23 Habraaca Qaabka Hagar la'aaneedka. Marka ay fulinayso hawlaheeda sida ku cad sharcigaan ama xeerarka, HBS waxay:

8.23.1 ku wargalinaysaa ashkhaasta danaynaysa arji kasta oo la qabto ama dhagaysi kasta oo ay samaysay, iyadoo la raacayo qaabka uu jideeyey sharcigaan ama ay tilmaameen xeerarka;

8.23.2 diyaarisaa dhagaysiyo la xariira bixinta, ka qaadidda ama ka joojinta ruqsadaha ku yimaada xaaladaha lagu sheegay sharcigaan ama xeerarka;

8.23.3 bixin kartaa qoraallo cadaynaya sababaha keenay go'aamadeeda, amaradeeda ama tilmaamaheeda, kuwaasoo loo arkaayey in ay habboonaayeen waqtiga la soo saaray go'aanka, amarka ama tilmaanta; iyo

8.23.4 ku salaynaysaa go'aanadeeda ku saabsan talaabooyinka ay qaaday, ammarada ama tilmaamaha ay bixisay dhagaysi ka dib, caddaymo, dood iyo xog la soo hordhigay dhagaysiga;

8.24 Canshuuro, Khidmado iyo Ganaaxyo. Wasaaraddu, iyadoo tixgalinaysa talooyinka HBS, ugana dan leh in ay soo ceshato dhammaan ama qaar kharashyada la galay, hadba sida ay go'aamiso hay'addu, iyadoo cuskanaysa masuuliyadda saran, marka loo eego sharcigaan iyo xeerarka, waxay ku soo rogaysaa shirkad kasta oo ruqsad haysata, si waafaqsan sharcigaan iyo xeerarka, canshuuro, khidmado iyo ganaaxyo munaasib ah, iyadoo soo gudbinaysa habka loo xisaabayo dakhliyadaas ka imaanaya ashkhaasta iyo shirkadaha iyo qaabka loogu xawilayo wasaaradda lacagta. HBS, waxaa kaloo ay qeexaysaa heerka dulsaarka iyo qaab xisaabeedka loogu go'aaminayo ashkhaasta iyo shirkadaha inta dulsaarka ah ee kaga aadan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada aaysan bixin markii laga rabay;

Qodobka 9
Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed

9.1 Samaynta Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed. Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni oo leh qaab shirkadeed.

9.1.1 xarunta Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed waxay noqonaysaa meel Soomaaliya ka mid ah oo ay wasaaraddu cayinto.

9.1.2 shirkadda Batroolka Soomaaliyeed waxay leedahay, marka laga eego xagga awoodaha, dhammaan xuquuqaha, awoodaha, mudnaanta iyo karti-sharciyeedka uu qofka caadiga leeyahay;

9.1.3 sharcigaan waxaa lagu dhaqayaa shirkadda Batroolka Soomaaliyeed si la siman sida lagu dhaqayo shaqsi kasta oo ruqsad haysta, lana waafajinayo hadba duruufaha soo kordha ama xaaladaha isbedbedala;

9.2 Ujeedada Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed. Ujeedada Shirkadda Batroolka soomaaliyeed waa mid ganacsi oo ay kontroosho Dawladdu, si ay u qabato hawlaha batroolka ee Soomaaliya gudaheeda. Shirkaddu waxay xaq u leedahay in ay isticmaasho xaqa ka qayb galka ee ku cad qaybta 24.1. Shirkaddu waxay heli kartaa

rukhsad ku salaysan gadasho xuquuq si toos ah iyadoo raacaysa hab tartan oo ay soo bandhigtay HBS, si la mid ah xaaladaha shakhsi kastoo kale;

9.3 Golaha Maamulka shirkadda. Shirkaddu waxay yeelanaysaa gole maamul oo ka kooban shirgudoon, Agaasime guud iyo in aan ka yarayn saddex (3) kana badnayn todoba (7) Agaasimayaal kale;

9.3.1 Shirgudoonka waxaa magacaabaya dawladda wuxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kastoo dawladda la habboon;

9.3.2 Agasimaha guud waxaa magaabaya dawladda waxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kasta oo dawladda la habboon. Waxaana xilka looga qaadi karaa sabab jirta. Agaasimaha guud mar kale waa la soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilkeeda dhamaado;

9.3.3 Agaasimayaasha kale waxaa soo magacaabaya dawladda ka dib soo jeedinta wasaaradda waxyna xilka haynayaa muddo aan ka badnayn saddex sano si loo xaqiijiyo, intii la karo, in sanadkiiba uusan xilka ka dhamaan wax ka badan kala bar oo bar agasimayaasha. Agaasime kastoo kale dib ayaa loo soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilligeedu dhamaado;

9.3.4 Sida ku cad qaybta 9.3.5, ma jiro shakhsi xaq u leh in loo magacaabo ama u hayo xilka shir-gudoonka, jagada agaasime guud, ama agaasime haddii aan shakhsigaasi ahayn Soomaali.

9.3.5 Marka la magacaabayo agasimayaasha qaarkood, wasaaraddu uma baahna in ay ku dhaqanto qaybta 9.3.4, haddii wasaaraddu u aragto in loo baahanyahay shakhsi aan Soomaali ahayn in uu caawin karo, ama ku biirin karo, Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed, iyadoo shardi looga dhigayo in inta badan agaasimayaasha (oo ay ku jiraan guddoomiyaha iyo agaasimaha guud) ay yihiin muwaadiniin Soomaali ah;

9.4 Kaalinta Golaha Maamulka Shirkadda. Golahu wuxuu hagayaa, maamulayaana hawlaha iyo arimaha la xariira shirkadda batroolka;

9.4.1 Golahu wuxuu, iyadoo go'aan ah, samaynaya xeer-hoosaadka lagu nidaaminayo hawlaha iyo arimaha la xariira shirkadda batroolka;

9.4.2 Goluhu wuxuu dhisayaa guddi fulineed, ama guddi kale oo kasta ama koox la talineed oo goluhu u arko in loo baahanyahay, wuxuuna cayimayaa inta ay ka kooban yihiin xubnahoodu, xilalkooda iyo mudada ay xilka haynayaan;

9.4.3 Goluhu wuxuu awood siin karaa, caddayn karaana xilalkooda iyo awoodooda guddiga fulinta si ay u qabtaan arimo kasta oo aan ku jirin sharcigaan ama xeer-hoosaadka ama go'aan, gaar ah, oo loogu tala galay in goluhu qaato;

9.4.4 Shir-gudoonku wuxuu ku dhaqmayaa awoodaha lagu qeexay xeer-hoosaadka shirkadda;

9.4.5 Agaasimaha guud waa sarkaalka madaxeedka ee fulinta hawsha shirkadda, wuxuuna hayaa, isagoo matalaya golaha, haggidda iyo maamulka hawlaha iyo arimaha laxariira shirkadda, isagoo awood shaqo u leh arimaha aan ku jirin sharcigaan ama xeer-hoosaadka kale ama go'aanada gaar-ahaaneed oo loogu tala galay in uu sameeyo goluhu ama guddiga fulintu. Dawladdu waxay siin kartaa Agasimaha guud magac kasta oo ay isleedahay waa ku habboon yahay, ilaa iyo inta uu yahay sarkaal madaxeedka fulinta hawsha shirkadda.

9.4.6 Haddii Agaasimaha guud maqan yahay, ama uusan xilkiisa gudan karin, ama haddii xilka xafiisku banana yahay, goluhu wuxuu magacaabayaa sarkaal ama shaqaale ka tirsan shirkadda in uu qabto xilka agaasimaha guud muddo aan ka badnayn sagaashan (90) casho iyadoo aan la sugin ogolaanshaha dawladda;

9.5 Saraakiisha iyo Shaqaalaha Shirkadda. Shirkaddu waxay qoran kartaa saraakiil iyo shaqqaale, waxayna shaqo galin karta wakiilo, la-taliyayaal, talo-bixiyayaal ay u aragto in ay yihiin lagama maarmaan si loo fuliyo ujeedada sharcigaan iyo hab wanaag u socodka hawlaha, shirkadduna waxay kol walba caddaynaysaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqaalayntooda ama qaadashadooda la xariirta;

9.6 Gunnooyinka Golaha Maamulka Shirkadda. Shir-gudoonka iyo agaasime kasta, marka laga reebo Agasimaha guud iyo agaasime kaloo kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda, waxay xaq u leeyihiin in shirkaddu siiso gunno ay xadiday wasaaraddu in ay ku hawlan yihiin shirarka golaha ama gudiyada golaha oo ay godanayaa waajibaadkooda sharcigu farayo;

9.7 Kharashka Agaasimayaasha Shirkadda. Agasimayaashu waxay xaq u leeyihiin in shirkaddu siiso sahay safar iyo kharash nololeedka oo ku baxaya marka ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo oo uu sharcigu farayo inta ay ugu maqan yihiin degaankooda shaqo rasmi ah;

9.8 Gunnooyinka Saraakiisha iyo Shaqaalaha Shirkadda. Saraakiisha, shaqaalaha, wakiilada, la-taliyayaasha, iyo talo-bixiyayaasha waxay xaq u leeyihiin in shirkadda Batroolka Soomaaliyeed siiso gunnooyin, kharashyo, iyo manfacooyin ay shirkaddu u xaddido.

Qodobka 10
Xadididda Xuquuqda Saraakiisha Dawladda

10.1 Xadididda iska Horimaadka Danaha Gaarka ah. Saraakiisha dawladdu ma heli karaan, iskumana dayi karaan in ay helaan ama haystaan:

10.1.1 ruqsad ama ku hammin dan gaara, ha ahaato mid toos ah ama dadban, oo la xariirta ruqsad, ama;

10.1.2 saami uu ku yeesho shirkad haysata ruqsad, ama mid iyada ku laran;

10.2 Waxa ka dhalan kara Xadgudubka. Qaab kasta oo wax lagu siiyo ama loogu andacoonayo in loogu ogolaado sarkaal dawladeed, wax dan gaar ah u muuqda, si toosan ama dadban, oo la xariirta ruqsad, loona arki karo siismo aan sharci ahayn, waa wax kama jiraan;

10.3 Ehelada. Helitaanka ama haysashada, ruqsad, ama yeelashada dan ama saami, oo la xariirta caruurta aan qaan gaarin ama xaasaska saraakiisha dawladdu, waxaa loo arkayaa mid uu helay ama haysto sarkaal dawladeed, wuxuuna ku xukun yahay sida ku cad faqradda 10.2;

10.4 Aan ka ahayn. Saraakiisha dawladda, oo ah Agaasimayaasha, shaqaalaha ama talo-bixiyeenada Shirkadda oo dan ku leh ruqsad ay haysato shirkaddu laguma dabiqi karo faqradaha kor ku xusan ee qodobka 10aad.

Qodobka 11
Qoqobid

Iyadoo la raacayo ujeedada sharcigaan, Dhulka Soomaaliyeed, ama qaybo ka mid ah, waxaa loo qaybinayaa xirmo-xirmo si waafaqsan habka iyo shuruucda caalamiga ah ee xadidaadda xirmooyinka.

BAABKA II: RUQSADA HAWLAHA BATROOLKA

Qodobka 12
Ruqsadda Sahaminta

12.1 Awoodda Bixinta. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay siin karta Ruqsad Sahamineed, oo la xariirta goob cayiman, shakhsi qaanuuni ah ama koox shirkado ah;

12.2 Xuquuqaha Ruqsadda Sahaminta:

12.2.1 Ruqsad Sahamineed waxay oggolaanaysaa in lagu sameeyo baaritaan ah geological, geophysical, geochemical and geotechnical oo ku saabsan ruqsadda aagga la baxshay;

12.2.2 Ruqsadda Sahamintu waxay faraysaa Shakhsiga Ruqsada haysta in uu soo sheego horumarka iyo natiijada baaritaanka, uuna xajiyo sirta arintaas la xariirta;

12.2.3 Ma jirto in ruqsad sahamineed marnaba u oggolaanayso shakhsiga haysta in uu ceel qodo, ama uu ugu xagliyo, kuna yeesho xuquuq uu uga mid noqon karo Heshiis Wax-soosaar wadaag;

12.3 Ruqsadaha Isdulfuula. Inta aan lagu bixin Ruqsad Sahamineed goob horay ruqsad loogu haystay, HBS waxay qoraal ogaysiin ah siinaysaa shakhsigii horay u haystay ruqsadda.**;**

12.4 Tanaasulid iyo Joojin.

12.4.1 Shakhsiga haysta Ruqsadda Sahaminta wuxuu iska celin karaa ruqsadda, markuu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, waxaana shardi ah in Ruqsad Haystuhu oofiyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.

12.4.2 Haddii Ruqsad Haystuhu uusan buuxin shuruudihii ku xirnaa Ruqsadda Sahaminta, HBS way ka joojin kartaa ruqsadda sahaminta shakhsiga ruqsadda haysta, kadib markay siiso waqti cayiman oo u ku saxo shardiga uu jabiyey;

Qodobka 13
Heshiisyada Wax-Soosaar Wadaagga

13.1 Awoodda Bixinta: Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay la gali karta Heshiis Wax-Soosaar Wadaag ee ku saabsan goob cayiman, shakhsi ama koox askhaas ah, ka dib markay cadaato in shakhsigaas ama kooxdaasi ay galeen heshiis wada shaqayneed oo ay oggolaatay HBS, sida ku cad faqradda 20.1. Heshiis kasta oo wax-Soosaar Wadaag ah waxaa saxiixaya Wasiirka, isagoo tixgalinaya talada HBS.

13.2 Qaabka loo noqdo Qandaraasle. Si uu ugu qalmo in uu galo Heshiis Wax-Soosaar Wadaag, shakhsigu waa:

13.2.1 in uu haystaa, ama uu heli karaa, awood dhaqaale, aqoon iyo karti xirfadeed, si uu u fuliyo Hawlaha Batroolka ee Agga Qandaraaska lagu bixiyey;

13.2.2 in uusan lahayn taariikh xun ee muujinaysa ku dhaqmid la'aan mabaadii'da wanaagsan ee qoysnimada ka dhaxaysa shirkadaha batroolka; iyo

13.2.3 in ay tahay shirkad leh masuuliyad xadidan, ama shakhsiyad sidaas oo kale u leh masuuliyad kooban;

13.3 Kali-Lahaansho.

13.3.1 iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobka 14, ama xaqa H.B.S u leedahay in ay bixiso Ruqsad Sahamineed, Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagu wuxuu siinayaa qandaraas laha xaq kali-lahaansho suu u qabto Hawsha Batroolka ee Agga Qandaraaska lagu siiyey;

13.3.2 Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagu waxuu ku kali ahaan karaa Saliidda Ceeriin, Gaaska Dabiiciga ah ama qaybaha kale ee Batroolku ka samaysan yahay;

13.3.3. Qandraaska bilawga ah ee goobta qandaraaska lagu bixiyey kuna salaysan Heshiis Wax- Soosaar wadaag kama badnaan karo 15,000 km2.

13.4. Ogeysiin Helitaan Batrool

13.4.1 Qandraaslahu wuxuu HBS ku siinayaa qoraal ogaysiin ah afar iyo labaatan (24) saac gudahood markastoo Batrool laga helo goobta uu ruqsadda u haystay;
.

13.4.2 Qandraslahu waa inuu gudbiyaa warbixinnada la xiriira helitaanka batroolka oo HBS codsatay.

13.5 Barnaamij Shaqo, Qorsho iyo Misaaniyadeed. Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagu wuxuu ku waajibaad yeelayaa Qandraaslaha inuu fuliyo, Hawlaha Batroolka si waafaqsan, kana baxsanayn barnaamijka shaqo, qorshaha iyo miisaaniyadda ay oggolaatay HBS.

13.6 Qodobada ay HBS u Baahantahay. Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga waxaa ku jira shuruudo qeexaya arrimaha soo socda.

13.6.1 waajib shaqo midka ugu yar oo la qaban karo inta lagu jiro mudada baaritaanka ee ku cad Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga;

13.6.2 ka tanaasulid qaybo ka mid ah goobta qandraaska lagu haysto inta marxaladda baaritaanka lagu jiro;

13.6.3 Qaab xisaabeedka royaltiga (haddayba jirto) iyo qaybsiga batroolka ka dhaxeeya qandraaslaha iyo xukuumadda;

13.6.4 hadday ku haboon tahay, leedahayna, sifo maaliyadeed oo ka duwan royaltiga iyo qaybsiga batroolka, oo ay ku jiraan xurmooyinka la xariira saxiixa iyo wax soo saarka;

13.6.5 sharciyo bii'adeed oo qeexaya sida loo ilaalinayo loona kaydinayo bii'ada;

13.6.6 hadday ku haboon tahay, waajibaad dhigaya shidaal siinta suuqa gudaha Soomaaliya, gaar ahaan, marka ay jiraan xaalado gurmadeed;

13.6.7 tababarada iyo shaqo siinta muwaadiniinta soomaaliyeed;

13.6.8 door-bididda isticmaalka qalabka iyo adeegyada laga heli karo Soomaaliya gudaheeda;

13.6.9 hadday ku habboon tahay, sugista iyo hubinta xasiloonida maaliyadeed iyo heshiisyadaba; iyo

13.6.10 Garsoorid caalami ah.

13.7 Canshuuraha hoos taga HBS.

13.7.1 Heshiis Wax-Soosaar Wadaag wuxuu sheegi karaa, in qandraaslahu bixiyo canshuurta dakhliga ee shirkadda ku waajibtay marka Soomaaliya dhexdeeda la joogo, ama midda shirkadda laga dhaafi karo oo la xariirta qabashada Hawlaha Batroolka ee Heshiiska Wax-Soosaar wadaagga.

13.7.2 Shirkadaha qandaraaslayaasha ah ee hoos taga Heshiiska Wax-Sooaar Wadaaga ee canshuur dhaafka leh kuma qaamaysna in ay baxshaan canshuurta dakhliga ee shirkadda marka loo eego hawlaha Batroolka oo la qabtay ee ku saabsan Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

13.7.3 Hadii Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaggu sheego in Qandaraaslaha laga dhaafay canshuurta dakhliga ku waajibtay, sharciyada maaliyadeed waa in loo habeeyaa sida ugu haboon si looga dhex arko qiimaha uu Qandaraslaha u leeyahay canshuur dhaafku.

13.8 Tanaasul iyo Joojin.

13.8.1 Haystaha Heshiiska Wax-Sooaar Wadaagu waa iska celinkaraa heshiiska, waqtiga uu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, iyadoo shardi looga dhigayo in Ruqsad Haystuhu fuliyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.

13.8.2 Haddii Ruqsad Haystuhu uusan u hoggaansamin shuruudaha ku xiran Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga, HBS waxay awood u leedahay in ay qoraal wargalin ah kaga joojiso heshiiska, qandaraaslaha uu khuseeyo, ka dib markay Ruqsad Haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.

Qodobka 14
Ruqsadaha ku Dhaqanka Dhulka

14.1 Awoodda Bixinta.

14.1.1 HBS waxay siin kartaa shakhsi ama koox ashkhaas ah ruqsad ku dhaqan dhuleed, oo la xariirta Aag cayiman.

14.1.2 HBS ma bixin karto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo aag ku saabsan, kaasoo lagu haysto Heshiis Wax-Soosaar Wadaag ama Ruqsad Sahamineed, ilaa iyo inta la tixgalinayo dhammaan codsiyaasha ka yimid ruqsad haystayaasha si muujinaysa in aysan jirin faragalin xadgudub ku ah xuquuqda uu leeyahay shakhsi kale oo ruqsad haysta.

14.2 Xuquuqaha la Baxshay,

14.2.1 Inta ay jirto, ruqsad ku dhaqan dhuleed oo u oggolaanaysa ruqsad haystaha inuu sameeyo mid ama ka badan arrimaha soo socda:

14.2.1.1 in uu dhiso, rakibo kuna shaqeeyo dhismooyin, kaabayaal iyo qalab kale; iyo inuu

14.2.1.2 hawlo kale qabto, sida ku cad ruqsadda goobta loo oggolaaday.

14.2.2 Ma jirto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo oggolaanaysa in ruqsad haystuhu ceel qodi karo.

14.3 Tanaasul iyo Joojin.

14.3.1 Ruqsadda ku Dhaqanka dhulku:

14.3.1.1 Waa ka tanaasuli karaa ruqsad haystuhu, isagoo qoraal ku wargalinaya HBS, taasoo lagu xirayo in ruqsad haystuhu fuliyo dhammaan waajibaadkii saarnaa; iyo

14.3.1.2 Way joojin kartaa HBS, waqti kastaba, iyadoo qoraal wargalin ah siinaysa, ruqsad haystuhu, haddii uusan buuxin shuruuduhii ku xirnaa Ruqsadda, ka dib markay ruqsad haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.

14.3.2 HBS waxay u gudbinaysaa qoraal looga soo celinayo ama lagu dhamaynayo ruqsadda uu haysto shakhsigu, kaaso aaggiisii ka socdaan hawlo la oggolaaday in lagu fuliyo ruqsadda u oggolaanshaha dhulka korkiisa ee markaas laga hadlayo.

14.4 Isku Xirka Hawgalinta. HBS waxay tilmaan siinaysaa haystayaasha ruqsadda dhul ku dhaqanka iyo ashkhaasta kale ee ruqsad haysta ee ku saabsan iskuduba-ridka hawlaha Batroolka oo ay ka wada simanyihiin.

Qobobka 15
U Jeedin ka soo Qaybgal

15.1 Dalabyada Ogolaanshaha.

15.1.1 HBS waxay ku soo bandhigaysaa oggaysiis caama, markay suuragal tahay, in loo soo qoro araaji codsi ruqsado, taasoo loo arko in uu yahay habka ugu wanaagsan oo ruqsadahaas lagu bixin karo.

15.1.2 Iyadoo aan la raacin qaybta 15.1.1, HBS waxay door bidi kartaa in ay ruqsado ku bixiso wada hadal toos ah, iyadoo aan soo bandhigin oggaysiisyo caam ah:

15.1.2.1 Haday yihiin Ruqsado ku dhaqan dhuleed; ama

15.1.2.2 ay yihiin dhammaan ruqsadaha kale, hadday ku jirto dan guud oo sidaas farli yeelaysa, kuna fadhida tilmaanta Wasaaradda ama Xukuumadda.

15.1.3. Hadday HBS bixiso ruqsad, iyadoo aan soo bandhigin in loo soo gudbiyo dalabyo, waa in ay u gudbisaa Wasaaradda iyo Xukuumadda sababta ay sidaas u samaysay.

15.1.4 Dalabyada ama araajida waa in lagu soo gudbiyaa mid ka mida luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka ama, hadday dhacdo in ay ku qoran tahay luqad kale, waa in ay la socota tarjumaad rasmi ah oo mid ka mida luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka, waana in lagu soo ridaa laguna soo gudbiyaa baqshad xiran.

15.2 Qodobada soo bandhigga Dalabyada.

15.2.1 Codsiga dalabyada la soo bandhigo waa in ay ku cadahay aagga laga hadlahayo, shaqooyinka la damacsanyahay, qaabka arjiyada loo xulayo, ujuurada oo lala dhiibi doono arjiga, iyo waqtiga, iyo habka araajida la samaynayo lana tixgalinayo in laga dhigo tartan dadka oo dhan u furan. .

15.2.2 Haddaan codsiga dalabyada si kale u sheegin, HBS waxay dooran kartaa in aysan siin ruqsad cidkastoo soo doonata.

15.3 Qodobada Arjiga ku Qoran.

15.3.1 Arjiga ruqsada waa in ay ku jirtaa soo jeedimmo ku saabsan:

15.3.1.1 xaqiijinta caafimaadka, nabadgelyada iyo daryeelka dadka ka shaqeeya ama kuwa ay wax ka soo gaaraan Hawlaha Batroolka;

15.3.1.2 dhawridda bii’ada, lagana hortago, lana yareeyo ama dib looga nadiifiyo wasakhaynta iyo dhibaatooyinka kale ee bii’ada uga imaanaya Hawlaha Batrolka;

15.3.1.3 tababaridda loo fidinayo shaqaalaha, iyadoo mudnaan gaar ah la siinayo kuwa ka shaqeeya hawlaha Batroolka, iyo guud ahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed;

15.3.1.4 ka qaybgalinta manaafacaadsiga loo fidinayo bulshada ku dhaqan aagagga ruqsadda laga baxshay iyo in la yareeyo, lana khafiifiyo saamaynta dhimaalka leh ee ka imaan karta hawlaha batroolka ee aagagga ruqsadda lagu baxshay;

15.3.1.5 badeecooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay, waa in laga gataa ashkhaasta degan gudaha Soomaaliya;

15.3.2 Ruqsadda la siiyey dalab keensadaha waxay ku waajib yelaysaa in uu u hoggaansamo soo jeedimada ku yaal oo dhan sida ku cad qaybta 15.3.1.

15.4 Tixgalinta Arjiyada. HBS ruqsad dhul ku saabsan ma bixinayso, tan iyo inta ay tixgalin ka siinayso dhammaan araajida la soo hordhigay oo jawaabta u baahan, xurmaynaysana codsiyada dalabyada loo soo wada gudbiyey;

Qodobka 16
Hawlaha Batroolka ee Guud

16.1 Ka Qaybgal Qolo Saddexaad. Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadaag ah iyo Ruqsada ku Dhaqanka dhulku waxaa shardi u ah in qolo saddexaad laga qayb galiyo, si ku fadhida shuruudo iyo arimo macquul ah oo la garwaaqsan karo.

16.2 Wadar iyo Kali Kali.

16.2.1 hadii ay jiraan, hal shakhsi wax ka badan oo wada haysta hal ruqsad oo cayiman, waajibaadyada iyo qaamaha dul fuulaya shakhsiga oggolaansho ruqsadeed haysta waxay la mid yihiin kuwo saaran dhammaantood, wadar ahaan iyo kali kaliba;

16.2.2 Marka laga hadlayo Heshiiska wax-Soosaar wadagga, Shirkadda batroolka Soomaaliyeed iyo qandaraasle kasta oo ay dawladdu leedahay, waxaa HBS ka dhaafi kartaa shuruudaha lagu soo bandhigay qaybta 16.2.1.

16.3 Waxa ka Imaanaya ku Xadgudubka Sharciyada. Ruqsad la baxshay, waa waxba kama jiraan hor iyo horaanba, haddii lagu helay ku xadgudub sharciyada Soomaaliya, oo ay ku jiraan kuwa la xariira musuq maasuqa.

Qodobka 17
Ilaalinta Bii'ada

17.1 Waajibaadka wax ka Qabashada Bii'ada. Shaqsiyaadka ruqsadda haysta ee wada hawlaha batroolka waxaa laga rabaa;

17.1.1 In ay yareeyaan wax u dhimidda bii'ada;

17.1.2 In ay iska ilaaliyaan in khasaare loo gaysto batroolka;

17.1.3 In ay ka hor tagaan wixii dhib ah iyo khasaare oo loo gaysan karo xirmooyinta dhulka hoostiisa oo batroolku fadhiyo;

17.1.4 In ay ka hor tagaan wasakhaynta bii'ada iyo macno daro u isticmalka

qaab dhismeedyada dhulka, ilaha iyo ceelasha biyaha nadiifta ah ku jiraan, dalagyada, xoolaha iyo nafley badeedka;

17.1.5 In ay ka hor tagaan, inuu batroolku ku fakan deegaanka, isagoo maraya marimo ama fogeeyayaal aan la koontaroolin;

17.1.6 In ay la yimaadaan, barnaajyada nadiifinta deg degga ah iyo hababka loo raacayo;

17.1.7 In ay sameeyaan, waqtiyada ay ku haboon tahay, daraasad deegaan oo saldhig ah inta aan la bilaabin hawlaha batrolka, iyo qiimaynta raadka ay deegaanka ku reebayso hawl kastoo wayn oo batroolka la xariirta;

17.1.8 In ay isticmaalaan, habka wanaagsan ee hawlgalka ceelasha batroolka, marka dib loo soo noolaynayo bii'ada dhammaadka hawlgalyada la xariira batroolka.

17.2 Xeerarka Nidaamiya Bii'ada. Wasiirka waa inuu soo saaraa xeerar si cad oo buuxda u qeexaya waajibaadyada saran shaqsiga ruqsadda haysta sida ku soo aroortay qaybta 17.1.

Qodobka 18
Dib u Celin iyo Magdhaw

18.1 Shuruudaha Lagu Helo Ruqsadda. Shakhsina marnaba kama samayn karo hawlgal batrool dhulka Jamhuuriyadda Soomaliya gudihiisa, marka laga reebo ruqsad daba joogta ruqsad kale oo waafaqsan sharcigan ama xeerarkiisa.

18.2 Dib u Celin. Iyadoo aan loo eegayn wax masuuliyad dambiyadeed oo u leeyahay shakhsiga qabta hawlo betrool oo ka duwan habka ruqsadu ogoshahay waxaa laga doonaya:

18.2.1 In uu dib ugu soo celiyo Jamhuuriyadda Soomaaliya lacag u dhiganta qiimaha suuqa uu ka joogo batroolka la hormariyey, ama la soo saaray ama la dhoofiyay, iyadoo ay la socoto dulsaarkii lacag bixintii u dambaysay oo heerkeeduna aan ka badnayn midka ay jidaysay Wasaaraddu;

18.2.2 In ay qiyaasto, qiimaha dhammaan dhismayaasha iyo qalabka loo isticmaalay in lagu fuliyo hawlaha batroolka, ama ay furfurto oo meesha ka qaado dhismayaashaas iyo qalabkaas, ama ay dhabarka u ridato bixinta kharasha ku baxaya furfuridooda iyo qaadidooda;

18.2.3 In ay nadiifiso, wasakhda ka timid hawlaha batroolka ama ay u celiso Soomaaliya kharashka nadiifinta ku baxaya.

18.3 **Baaxadda Tirada.** Qaamaha ku cad qaybta 18.1 waxaa loo cabirayaa si iskuduub ah; haddii kale, waxay noqonaysaa mid ay go'aamiso hay'adda batroolka Soomaaliyeed hadba sida ay dan moodo, iyadoo loola jeedo in Soomaliya aysan hoos uga dhicin meeshii ay mudnaan lahayd, haddii hawlaha batroolka ee la guda galay loo fulin lahaa sidii la rabay, iyadoo la tixraacayo ruqsadda la bixiyey.

18.4 **Qaan Wadareed iyo Mid Kali Kali ah.** Qaamaha ku cad qaybta 18.1 oo ay wada galeen ashkhaasta hawlaha batroolka ku wada jira ama horay ugu wada jirey, waa qaamo loo haysto ashkhaasta ay khusayso wadar ahaan iyo kali kaliba.

Qodobka 19
Xadidaadda Xuquuq ku Dhaqanka

19.1 **Magdhow Munaasib u ah Mulkilaha dhulka.**

19.1.1 Shaqsiga ruqsadda haysta kuma isticmaali karo, marnaba, xuquuqda la siiyey ee ku cad ruqsadda ama sharcigaan hadday taabanayso:

19.1.1.1 Hantida guud ee ma guuraanka ah, haddii aan ogolaansho looga helin Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS);

19.1.1.2 Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah ee dalka, haddii aan ogolaansho looga helin Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS).

19.1.1.3 Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah, iyadoo aan la siin mulkilaha magdhaw munaasib iyo macquulba ah, oo ay xadiday HBS.

19.1.2. Mulkilaha hantida ma guurtada ah ee ku taal goob ruqsad lagu baxshay wuu haysanayaa xuquuqdiisa isticmaalka dhulka, haddii isticmaalkaasi uusan faragalin ku samaynaynin socodsiinta hawlaha batroolka.

19.1.3 Ruqsadi waa xadidi kartaa ama si la mid ah waa u kontroli kartaa shakhsiga ruqsadda haysta ee isticmaalaya kaabayaasha dawladda, iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah oo ay ka mid yihiin geedaha, carrada, jayga, dhagaxa iyo biyaha.

19.1.4 Ruqsadi ma aha mid ridaysa waajibaadka looga raadsanayo masuuliinta xilku saaranyahay ogolaansho qoraal ah, marka laga reebo arimaha sida gaarka ah ruqsadda loogu caddeeyey.

19.2. **In aan Faragalin Lagu Samayn Hawlaha Sharciga ah ee Badda ka Socda**. Shakhsi ruqsad haystaa uma isticmaali karo xuquuqda ku cad ruqsadda, ama sharcigaan iyo xeerarkiisa, si faragalin ku ah kaluumaysiga, badmareenimada ama hawl kasta oo badda laga hayo ee sharci ah, iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga helin masuuliyiinta awoodda u leh.

19.3 Magdhawga Carqaladaynta ku Saabsan.

19.3.1 Shakhsiga ruqsadda haystaa, wuxuu masuul ka yahay bixinta magdhaw caadila oo macquula oo ay qeexday HBS, haddii inta ay socoto hawsha batroolku uu:

19.3.1.1 Carqaladeeyo, xuquuqda shakhsi iska leeyahay oo ku saabsan hanti maguurtaan ah, ama uu waxyeelayn gaysto;

19.3.1.2 ku sameeyo, si muuqata, faragalin kaluumaysiga, badmareenimada ama hawl kasta ee badda laga hayo oo sharci ah.

19.3.2 Haddii qiimaha xuquuqdu ay kordhiyaan hawlaha batrolka, magdhawga xuquuqdaas laga bixinayaa, waa in uusan ka badnaan qiimaha markasta la bixin lahaa haddiiba laga soo qaado in uusan qiimuhu kordhin.

19.4 Magdhow Munaasib iyo Macquulba ah. Waxa la oran karo magdhow munaasib iyo macquulba ah, sida uu sheegayo Qodobka 19, waxaa goynaya Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS), ka dib markay tixgaliso cabashooyinka dhinacyada danaynaya arrintaan.

Qodobka 20
Ansixinada Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS)

20.1 Ansixinta Heshiisyada. Heshiis wada shaqayneed, laalista isafgrashooyinka iyo heshiis kasta oo la xariira hawlaha batroolka, iyo sidoo kale isbedello kasta oo ku yimaada heshiisyadaas, waa in ay marka hore soo helaan ogolaanshaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed. Hay'adda (HBS) waa in ay ansixisaa heshiisyada noocaas oo kale ah ama isbedelada, iyadoo hubinaysa in ay la socon karaan shuruudaha ruqsadaha, Sharciga iyo Xeerarkiisa.

20.2 Ansixinta Isbedellada Kontroolka.

20.2.1 Dhammaan isbedellada ku yimaada kontroolka shakhsiga ruqsadda haysta, waa in uu marka hore helaa ansixinta Hay'adda Batroolka soomaaliyeed;

20.2.2 Meesha uu ka dhaco isbedel kontrool isagoo aan marka hore haysan ansixinta HBS, hay'addu way joojinaysaa meel marinta ruqsadaas iyada ah;

20.2.3 Iyadoo la fulinayo ujeedooyinka qaybta 20.2.1, isbedel Kontrol waxaa ka mid ah shaqsi joojiyey inuu lahaado Kontrolka (ha yeesho ama yuusan yeelan kontroolka shakhsi kale) iyo shakhsi lahaaday kontroolkaa isaga ah (ha yeesho ama hore ha u lahaadee kontroolka shakhsi kale).

20.3 **Ansixin kala wareejin.** Marka laga reebo qoraal oggolaansho ah ee HBS (kaasoo aan la hakin karin ama la daahin karin si aan aqligal ahayn), ama si caddaan ah loogu qeexay shuruudaha ruqsadda, ma jiri karo waajib, wareejin, gudbin, cusboonayn, iskudar, rahmid, ama macaamil kaloo la mid ah oo la xiriira ruqsadda, oo noqon karta dhaqangal ama lahaan karta raad midna. Xeerarku waa in ay qeexaan habka ay HBS u qiimaynayso ku haboonaanta ogolaanshaheeda.

Qodobka 21
Qandaraaska Midaynta

21.1 Midaynta.

21.1.1 Haddii ama markii kayd batrool la helo uu qaarkiis ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaal aag kale oo qandaraas kale lagu galay:

21.1.1.1 Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay dalab qoraal ah ku codsan kartaa, in qandraaslayaashu la galo midba midka kale heshiis midaynayn ah si loo xaqiijiyo waxtarka korna loogu qaado wax soosaarka batroolka oo ku jira haraha kaydka; iyo

21.1.1.2 Haddii aan heshiis la gaarin sideed iyo toban (18) bilood gudahood, laga bilaabo, marka la helo qoraalka dalabka ah sida uu dhigayo qaybta 21.1.1.1, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynaynta.

21.1.2 Haddii ama markii kayd batrool la helo uu qaarkiis ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaal aag aan heshiiska waxsoosaar qaybsiga ku jirin:

21.1.2.1 Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (H.B.S) waxay codsan kartaa si qoral ah, in qandraaslahu la galo heshiis midaynayn ah HBS, si loo xaqiijiyo waxtarka korna loogu qaado wax soosaarka batroolka oo ku jira haraha kaydka ah; iyo

21.1.2.2 Haddii aan heshiis la gaarin sideed iyo toban (18) bilood gudahooda, laga bilaabo marka la helo qoraalka dalabka ah, sida ku cad qaybta 21.1.2.1, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynaynta, haddii aan si kale looga caddayn heshiiska wax soosaar wadaagga ah;

21.2 Heshiis Midaynayn. Iyadoo aan la xadidayn arimaha laga wada hadlayo, heshiiska midaynayntu waa in uu qeexaa inta batrool ku jirta aag kasta oo heshiiska midaynayntu daboolayo, waana in uu magacaabaa shaqo-wadaha masuulka ka ah soo saarka batroolka heshiiska midaynayntu sheegayo.

21.3 U Baahnaan Ansixin. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) way oggolaan kartaa sii wadidda horumarinta ama wax ka soosaarka harada qaarkeed ka mid yahay aagga qandaraaska lagu sheegayo ee ku cad qaybta 21.2, kaliya marka la ansixiyo ama la go'aamiyo heshiiska midaynaynta.

21.4 Ansixin Isbedello. Isbedel kasta oo lagu samaynayo heshiiska midaynaynta waa in uu marka hore haysta ansixinta HBS.

Article 22
Xallinta Khilaafaadka

22.1 Kaalinta HBS ee La Xariirta Khilaafaadka.

22.1.1 HBS way baari kartaa go'aanna way ka gaari kartaa dhammaan khilaafyada la xariira ashakhaasta ku hawlan shaqooyinka batroolka, ha ahaadeen kuwo:

22.1.1.1 iyaga dhexdooda ah, marka heshiiskoodu uusan qeexayn habka loo xallinayo khilaafaadka;

22.1.1.2 la xariira qolo saddexaad (oo aan ahayn dawladda), oo aan sidaa isla markaana ugu xirnayn, ilaa iyo inta ay qoladaas saddexaad aqbalsan yihiin xukunka HBS ee xallinta khilaafaadka.

22.1.2 HBS way diidi karta in ay go'aan ka gaarto khilaafaad kasta oo loo soo gudbiyo, hadday sidaas samaysana, waxay qoraal ahaan ku ogaysiinaysaa qolooyinkii khilaafaadku ka dhexeeyey.

22.1.3 HBS, iyadoo tixgalinaysa dhammaan xaaladaha muhiimka ah ee jira, waxay talo ku bixin kartaa tilmaan kastoo loo baahdo si go'aankeedu ugu yeesho saamayn dacwadaha socda, sida ku cad qodabka 20, uuna ka mid yahay, ku amridda bixinta kharaj celin oo qolo khilaafaadka ka mid ah u celinayso qolo kastoo kale oo khilaafka iyaduna ka mid ah, hadba sidii munaasib iyo macquulba noqon karta.

22.2 khilaafaadka la Xariira Dib u Oggolaanshaha.

22.2.1 Haddii khilaaf dhasho, la xariira fasiraadda iyo/ama meel marinta shuruuraha ruqsad ku qoran ee u dhexeeya shakhsi ruqsad haysta iyo HBS, dhinacyada arintaasi taabanayso, waa in ay isku dayaan in ay ku dhameeyaan khilaafkaas, si wada hadal ku salaysan.

22.2.2 Haddii khilaafka lagu xallin waayo, si saaxiibnimo leh oo wada-hadal ku dhisan, labada dhinacba waxay dacwadooda u gudbin karaan garsoor caalami ah

si waafaqsan xeerarka la aqoonsanyahay, oo rugtiisu tahay meel dhex-dhexaad ah, ama Maxkamadda Sare, sida uu door bidayo dhinaca dacwadda soo gudbiyey.

Qodobka 23
Ka Dhaafid ama Bedelid Shuruudo

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waa ka dhaafi kartaa shakhsi Ruqsad haysta in uu ku dhaqmo shuruudaha ku qoran Ruqsadiisa, waxay kaloo, xittaa, oggolaan karta in ay wax ka badasho ama laasho shuruudahaas, shardi ama shardi la'aan, si ku meel gaar ah ama si joogto ah, shardiguna yahay in HBS u gudbiso qoraal ay ku caddaynayso sababaha ay sidaas u yeeshay wasaaradda. Qodobkaan 23, kuma jirto awood ka dhaafid ama ka laalis waajibeed oo ku saabsan in la bixiyo lacag kastoo ruqsadda ka timaada.

BAABKA III: KA QAYBGALINTA SOOMAALIYA

Qodobka 24
Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed iyo ka Qaybgalinta Dawlad Goboleedka

24.1 Ka Qaybgalinta Shirkadda iyo Dawlad Goboleedka. Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadag ah waa in ay ku caddahay:

24.1.1 Xaqa ay Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed u leedahay in ay ka qaybgasho hawlaha Batroolka, ugu badnaan ka qaybgal dhan 30%; iyo

24.1.2 Xaqa qandaraaslaha ee ka midka ah Dawlad Goboleed, taasoo ka mid ah Jamhuuriyadda Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaalo, si ay uga qaybgasho hawlaha batroolka ilaa iyo heer gaarsiisan 10% ugu badnaan marka la eego xaqa ka qaybgalka.

24.2 Go'aan ka Qaybgal. Go'aanka Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed ay uga qaybgalayso hawlaha batroolka ee si cayiman uga cad heshiis wax soo-saar wadaag ah, waxaa gaaraya Wasiirka, haddii talada ka qaybgalka ay soo jeedisay shirkaddu. Go'aanka qandaraasle dawlad goboleed oo ka mid ah Jamhuuriyadda Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaalo, uga qaybgalayo hawlaha batroolka waxaa qaadanaya dawlad goboleedka oo uu hoos imaanayo halka dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo.

24.3 Waqtiga ka Qaybgalka. Xaqa ka qaybgalka ee lagu sheegay qaybta 24.1, waxaa la hanan karaa inta lagu guda jiro marxalad kasta ee hawsha batroolku ay socoto, iyadoo la raacayo xeerarka iyo shuruudaha loo dhigay Heshiiska Wax-Soosaar Wadagga.

QAYBTA IV: HAB U SOCODKA HAWLAHA BATROOLKA

Qodobka 25
Hawl Qabashada

25.1 Dhaqanka Wanaagsan ee Goobta Saliida. Hawlaha Batroolka waxaa loo qabanayaa si waafaqsan Dhaqanka Wanaagsan ee Goobta Saliida, kaasoo la waafajinayo dhaqamada iyo hababka ay isticmaalaan Shirkadaha Batroolka Adduunku, ayna fuliyaan hawl wadeenno taxaddar iyo xilkasnimo leh, iyagoo dhawraya shuruudaha iyo xaaladaha la midka ah ee ay horay u soo mareen, lana xariira dhinacyada muhiimka ah hawlaha batroolka, oo asalkeediiba loola jeeday in lagu sugo:

25.1.1 Dhawridda khayraadka batroolka, oo loola jeedo ka faa'iidaysiga hababka iyo nidaamyada haboon, si halka ugu saraysa loo gaarsiiyo soo kabashada wax soo saarka haydrokarbooniska, si iswadis leh xag farsamo iyo xag dhaqaale, iyadoo lala beegsanayo in aysan dhicin hoos u dhac ku yimaada kaydka, lana isticmaalayo mabaa'diida wax ku oolka ah ee heerarka wax soo-saarka iyo dhawrista bii'adda, si loo yareeyo wax yeelaynta dhulka korkiisa;

25.1.2 Falgalka nabadgalineed, oo la xariira isticmaalka hababka iyo nidaamyada horumarinaya nabadgelyada shaqada iyo ka hortagga shilalka;

25.1.3 Dhawrista bii'ada, oo waajib ka dhigaysa in la raaco hababka iyo nidaamyada yaraynaya wax u dhimidda bii'adda ee ka dhalan kara hawlaha batroolka;

25.2 Xanaanayta. Wax-Soosaarka Batroolku wuxuu u dhici karaa:

25.2.1 Intii la kari karo oo suuragal ah, si walba, looga soo saaro batroolka meesha uu ku jiro oo ka mid ah kayd walba, ama kaydad isku darsan;

25.2.2 Si waafaqsan dhaqanka wanaagsan ee goobta saliidda iyo maba'diida dhaqaale ee caafimaadka leh; iyo

25.2.3 Intii la kari karo, si walba, laga fagaado khasaare ku yimaada batroolka iyo tayada kaydka saliidda.

25.3 Qiimeynta Joogtada ah. Qandaraaslayaashu waa in ay sameeyaan qiimeyn joogto ah ee qorshaha fog ee batroolka iyo isticmaal xirfadeedka ee xal u helidda umuuraha, isla markaana waa in ay qaataan talaabooyinka loo bahanyahay, si loo gaaro arimahaas, lana socodsiiyaan HBS isbadel kasta oo macna leh, siduu qabo dhaqanka wanagsan ee goobta saliidda.

Qodobka 26
Dib u Furfuridda Hawgalka Batroolka

26.1 **Waqtiyeynta Dib u Furfuridda.** Shakhsiga ruqsada haystaa marka ugu dhaqsiyaha badan oo u samaynayo dib u furfuridda waa marka:

26.1.1 Uu joojinayo ruqsadda; ama

26.1.2 Aan looga baahnayn, mar dambe, qabashada hawlo batrool; ama laba daraadleba:

26.1.3 Aysan jiri karin ogolaansho qoraal ah oo laga helo HBS, waafaqsanna xaaladaha ogolaanshaha la bixiyey: ama

26.1.4 Aysan, si kale, ruqsaddu u sheegin

26.2 **Faahfaahinta Ruqsadaha iyo Xeerarka.** Ruqsadaha waa in ay ku jirtaa qodobo ka hadlaya Dib u furfuridda hawlaha batroolka. Wasaaraddu, iyadoo raacaysa talada iyo ku talinta HBS, waxay samayn kartaa Xeerar Sharcigaan hoos yimaada oo la xariira Dib u furfuriddaa hawlaha batroolka.

BAABKA V: XOG IYO BAARITAAN

Qodobka 27
Macluumaad iyo Xog

27.1 **Lahaanshaha Macluumaadka iyo Xogta.** Soomaalidu waxay xaq u leedahay laanshaha dhammaan macluumaadka iyo xogta, ha ahaadeen kuwo cusayb ah, kuwo la soo xigtay, kuwo laga shaqeeyey, kuwo la tarjumay ama laga baaraandagey, oo la helay, lana xiriira ruqsad kasta oo la baxshay. Xilkasnimada sir xajinta haboon, waxaa loogu dhaqmayaa si la mid ah sida ku cad qaybaha 7.2 iyo 8.9.

27.2 **Xog Gudbin.** Macluumaadka iyo Xogta la helo, inta lagu guda jiro hawlaha batroolka, waxaa si xor ah u gudbin kara ashkhaasta haysta Ruqsad, iyadoo shardi looga dhigayo in HBS ay dalabto assalka shayga, marka laga hadlayana nuxurkoodu, uu yahay dhagxaan, dareerayaal ama samballo kaloo muuqaal leh, iyadoo Soomaaliya gudaheeda lagu haynayo qayb la isticmaali karo oo assalka shayga ah, lana xariira dhammaan macluumaadka iyo xogta oo qaab muuqaal iyo Elektroonikba leh.

Qodobka 28
Xisaabid iyo Baaris

28.1 Kormeere.

28.1.1 HBS waxay u magacaabi karta shakhsi in uu noqdo kormeere, marka laga hadlayo ujeedooyinka Sharcigaan.

28.1.2 Kormeeruhu, wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo xuquuqaha lagu siiyey Xeerarka.

28.2 U Madax Banaanaanta Helista Diiwaanada iyo Xisaabaadka. Shakhsiga Ruqsada haysta, codsi ka dib, waxuu ku soo wareejinayaa HBS diiwaanada iyo xisaabaadka la hayo oo baaritaanku ku socdo.

Qodobka 29
Joojinta Ruqsadaha

29.1 Joojinta.

29.1.1 Joojinta Ruqsad la baxshay, sabab kasta awgeed, waa in ay noqotaa mid aan waxba u dhimayn xuquuqda iyo waajibaadka lagu caddeeyey Sharcigaan, Xeerarka ama Ruqsadda; loogana dan-leeyahay in looga samata baxo ficilka joojinta, xuquuqda iyo waajibaadka ka soo unkamaya talaabadaas iyada ah, ka hor inta aan la hirgalinin falka joojinta, iyo dhammaan qodobada ku soo arooray ruqsadda, looguna baahan yahay si caqli gal ah, oo ka dhigaysa in xuquuqda iyo waajibaadku si buuxda u noqdaan kuwo dhaqangal ah oo raali galin kara shakhsiga, keeni karana ka gudubka wixii ku saabsan falka joojinta, intii muddo ah ee loo baahan yahay.

29.1.2 Hay'adda (HBS) waxay leedahay awoodda ay ku joojin karto Ruqsadda, sida lagu caddeeyey isla Ruqsadda.

29.2 Ashkhaasta Ruqsad Wadareed Haysata.

29.2.1 Haddii ay jiraan, tiro wax ka badan hal shakhsi oo Ruqsad haysta, oo ku saabsan ruqsad cayiman; xaaladana dhashaan oo keenaya in HBS ay joojiso Ruqsad, HBS waxay door bidaysaa in ay ruqsadda xariga u jarto, iyadoo lagu soo koobayo oo kaliya ashkhaasta ruqsadda haysta oo ficiladoodu ama gaabintoodu (markay la xariirto ashkhaasta ficilada, gaabinta ama dhacdooinkuba la soo gudboonaadeen), kuwaasoo dhaliyey xaaladaha caynkaas oo kale, waxayna ogaysiin sidaas ah siinaysaa inta soo hartay ee ashkhaasta Ruqsada haysata.

29.2.2 Marka HBS ay joojiso ruqsadda, sida ku cad qaybta 29.2.1, waa inay siisa ashkhaasta ruqsadda leh ee soo haray, xaqqa mudnaanta si ay u noqdaan kuwa ugu horeeya ee hela saamigii la joojiyey si u dhiganta saamiyada la kala leeyahay. Saami kasta oo aysan iibsan kuwa ruqsadda ku soo haray waa inuu ku soo wareegaa Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Qodobka 30
Beriyeelaynta Dawladda Dhexe, Wasaaradda iyo H.B.S

30.1 Beriyeelaynta. shaqsiga haytaa ruqsada waa inuu:

30.1.1 Ka difaacaa, kana dhawraa, waxna usan ugu dhimin Dawladda, wasaaradda iyo HBS, dacwo kasta oo ka timaada qayb sadexaad, ha ahaato mid toos ah ama dadban, oo la xariirta hawlaha batroolka, bixiyaana dhammaan magdhwyada ku saabsan dacwadaha madaniga ah, ashtakooyin ismuudsiin ku dhisan ama codsiyo; iyo

30.1.2 Ilaa iyo inta ay Wasaaraddu ku qancayso, kadib markay la tashato shakhsiga ruqsadda haysta; dambiyada la filayo ee ku cad qaybta 30.1.1, waxaa lagu xallin karaa siyaalo kale oo ay ka mid tahay talo galin shirkad kale ama damaanad bangi ama warqadda ballanqaad ee caddaynaysa dhabar u ridashada deynka iyo caymis galin la xiriira baaxadda daymanka, kuna dhisan xisaabtan xoog leh, hadba sida Wasaaradda u rabto, waqti ka waqti.

BAABKA VI: FAAFIN GUUD

Qodobka 31
Faafinnada Hay'adda (HBS)

31.1 Faafin. HBS waxay ku faafinaysaa bullatiinadeeda rasmigiga ah;

31.1.1 Wargelinta ku saabsan bixinta Ruqsadaha, iyo shuruudaha kooban ee ruqsadaha caynkaas oo kale ah;

31.1.2 Soo bandhigid dalbashada codsiyada ka qaybgalka Ruqsadaha sida ku qoran qaybta 15.1.1, iyo

31.1.3 Wargelin la xariira sida loo joojinayo Ruqsadaha.

31.2 Faafinta Dalabka Codsiyada. HBS waa inay soo bandhigtaa dalabyada cosdiyada, kuwaasoo loogu soo gudbinayo araajiyo ruqsado waydiin ah, sida ku cad qaybta 15.1.1, kadib marka la faafiyo, si waafaqsan Xeerarka.

Qodobka 32
Wargalinta Dadwaynaha

32.1 Ka Qaybgalka Dadwaynaha.

32.1.1 Hay'adda (HBS) waa in ay gacanta u galisaa dadwaynaha:

32.1.1.1 Shuruudaha muhiimka ah ee la soo koobay, lana xiriira, dhammaan ruqsadaha iyo isbadellada ku saabsan ee la soo bandhigay, haddii ay yihiin kuwo la joojiyey ama haddii kalaba.

32.1.1.2 Faahfaahinta canshuur dhaafyada la sameeyey, ama bedellada iyo hakinnada ee la xiriira shuruudaha ruqsadda ee ku cad Qodobka 23; iyo

32.1.1.3 Nuqullada dhammaan heshiisyada Midaynta.

32.1.2 Hay'adda (HBS) waa in ay dadwaynaha gacanta u galisaa, in ku siman waqti macquul ah gudihiisa, faah-faahin kooban, haddii la waydiisto arintaas, oo ah:

32.1.2.1 Qorshaha Horumarineed ee la ansixiyey; iyo

32.1.2.2 Dhammaan shaqooyinka iyo macaamilada kale oo la ogolaaday ee la xariira Ruqsadaha, iyada oo loo tixgalinayo in is-aamininaada kala ganacsigu uu yahay mid ku dhisan shuruudaha ganacsiga.

32.2 Soo Bandhigidda Sababaha. Toban casho, oo maalmo shaqo ah gudahood, oo la xariira codsi la sameeyey, HBS waa in ay soo bandhigta, si kooban, sababaha ay:

32.2.1 U bixisay Ruqsad, ka dib, marka ay shaacisay dalabyo la xiriira codsi, sida ay sheegayso qaybta 15.1.1;

32.2.2 U bixisay Ruqsad, iyadoo aan la shaacin dalabyo la xiriira codsi, sida ku qoran qaybta 15.1.2;

32.2.3 U ansixisay qorshaha horumarineed ee hoos imaanaya Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

32.2.4 U bixisay canshuur dhaafka, ama u ogolaatay bedelaad iyo hakin ku saabsan shuruudaha Ruqsadda ee ku cad Qodobka 23; iyo

32.2.5 U gaartay go'aan kasta ama ay u bixisay ogolaansho u baahan faafin, iyadoo la xurmaynayo Ruqsadda.

32.3 U Haggansanaanta Warbixinada.

32.3.1 Shirkaduhu waa in ay warbixin ka keenaan sida ay ugu hogaansanyihiin shuruudaha la xiriira sharciga iyo ruqsadaha, si waafaqsan habka iyo faah-faahinada looga baahanyahay ruqsaddooda, sida lagu caddeeyey Xeerarka.

32.3.2 HBS waa in ay u soo bandhigtaa dadwaynaha warbixinadaas, marka laga reebo qayb kasta oo ka mid ah warbixinta oo shakhsiga Ruqsada haysta uu codsaday in sir ahaan loogu xajiyo, taasoo hay'addu u aqoonsatay in ay ka mid tahay sir wax kala iibsiga.

32.4 Ogaanshaha Dadwaynaha ee Xogta Lacagaha la Baxshay. HBS waa in ay dadwaynaha soo hor dhigtaa warbixinada caynkaas oo kale ah oo laga helay ashkhaasta ruqsadda haysta, oo ku saabsan lacagaha la xiriira hawlaha batroolka oo ay siiyeen Dawladda Soomaaliyeed

32.5 Khidmada ka Qaybgalka. Wararka ku soo arooray Qodobka 32, way u furan yihiin ogaalkooda shakhsi kasta, marka laga hadlayo, bixinta khidmadaha halkaas ku cad, sida uu qorayo xeerka

32.6 Luqadda. Wararka ku qoran qaybta 32.1.2, waa in ay ku soo baxdaa ugu yaraan hal luqo oo rasmi ah ama luqadda labaad ee dalka.

Qodobka 33
Isu Dhuundaloolidda

33.1 Mabaadiida Isu dhuundaloolka. Mabaadiida soo socota, waxaa lagu dhaqayaa hawlaha batroolka, iyadoo loo marayo sharcigaan, iyo xeerarka la soo saaray ee lagu fulinayo sharcigaan, iyo qawaaninta, tilmaamaha, go'aamada iyo amarrada loo dajiyey in sharcigaan lagu dabagalo:

33.1.1 Waxaa jiraya faafin caadiyeysan oo ku saabsan dhammaan arimaha lacag bixinta batroolka oo ay sameynayaan ashkhaasta ruqsadaha haysta, kuna siinayaan Dawladda. Dhammaan dakhliga maadiga ah oo Dawladdu ka heshay ashkhaasta ruqsadda haysata, waa in loo soo bandhigaa kullan ballaaran, oo aan qarsoodi lahayn, oo ah mid ka qaybgalkisu u furan yahay dhan walba, loona qabto si macquul ah;

33.1.2 Dhammaan kharaj bixinada iyo dakhliyada maadiga ah, waxay ku qoton-sanaanayaan hab aaminaad iyo baaritaan madax-banaani leh oo waafaqsan heerarka caalamiga ee xisaabinta;

33.1.3 Dhammaan kharaj bixinta iyo dakhliyada maadiga ah, waa in uu iswaafajiyaa maamule madax-bannan oo loo qaateen ah oo ay Dawladdu magacawdo, kaasoo ku shaqaynaya nidaamyada caalamiga ah ee xisaabinta, taasoo ay la socoto soo shaacbixinta aragtida maamulaha ee ku saabsan isu-keenidda xisaabaadka, oo ay ku jirto wixii isdhaaf ah, oo laba daraadlaba ay tahay in la tilmaamo.

33.1.4 Ashkhaasta ka socota bahwaynta ganacsiga Soomaaliyeed oo aan lugta ku-la jirin hawlaha batroolka, waa in ay si firfircooni leh uga qaybqaadan karaan, noqonayaanna ka qaybgalayaal xagga currinta hindisooyinka, ka warqabka, iyo qaymaynta geedi socodyada looga hadlayo qaybta 33.1.

33.1.5 Mabaadiidaan, waa in lagu maamulaa Shirkadda Batroolka Soomaaliyeed iyo Qandarasle kasta oo Dawlad goboleedyada dalka ka tirsan.

QAYBTA VII: XEERARKA IYO TILMAAMAHA

Qodoka 34
Xeerarka

34.1 Awood Samaynta Xeerarka.Wasaaraddu, iyadoo tixgalinaysa talooyinka iyo soo jeedinta HBS, waxay samaynaysaa Xeerar hoos yimaada Sharcigaan oo la xariira arimaha soo socda:

34.1.1 Habka kala qoqobidda dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya,

34.1.2 Raadinta, horumarinta iyo soo-saaridda batroolka;

34.1.3 Isticmaalka iyo soo bandhigidda xogta, macluumaadka, diiwaanada iyo warbixinada;

34.1.4 Cabiraadda, iibinta ama ka maarmidda batroolka;

34.1.5 Caafimaadka iyo ammaanka;

34.1.6 Ilaalinta iyo dib u noolaynta bii'adda;

34.1.7 Maamulidda khayraadka;

34.1.8 Dhismooyinka, kaabayaal dhismo iyo xaruumo;

34.1.9 Nadiifinta ama dib u saxidda raadadka la xiriira batroolka fatahay;

34.1.10 Ka gurasho iyo dib u furfuris;

34.1.11 Kontroolka dhaqdhaqaaqa gudaha iyo dibadda Soomaaliya ee la xiriira

ashkhaasta, maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo wax kasta ee bani'adam sameeyey oo qaab rakooyin iyo dhismooyinba leh;

34.1.12 Qorsho shaqo iyo miisaaniyadeed.

34.1.13 Kontroolka canshuuraha ka imaanaya, lana xiriira soo galitaanka qolo saddexaad;

34.1.14 La xisaabtanka shaqsiga ruqsadda haysta, xisaabaadkiisa iyo diiwaanadiisa;

34.1.15 Warbixinada ay soo gudbinayaan ashkhaasta ruqsadda haysta, kuna saabsan u hogaansananta waajibaadyada lagu cadeeyey Sharcigaan iyo ruqsadahaba, ayna ku jiraan waxyaabaha soo socda:

34.1.15.1 Tababarrida iyo shaqaalaynta muwaadiniin Soomaaliyeed;

34.1.15.2 Gadashada badeecadaha iyo adeegyada laga helo gudaha Soomaaliya;

34.1.15.3 Dhowridda caafimaadka iyo ammaanka goobta shaqada, iyo

34.1.15.4 Ilaalinta bii'ada.

34.1.16 Ujuurooyinka la bixinayo oo ay ku jiraan, kuwa ashkhaasta ruqsadaha dalbanaya, kuwa ruqsadaha haysta, sidoo kale kuwa ashkhaasta raba inay baaraan diiwaanka guud; iyo

34.1.17 Arrin kaloo kasta oo la xiriirta sharcigaan;

34.2 Mabaadi'da Nidaaminta. Marka la samaynayo xeerarka, dawladdu waa in ay raadisaa, sidii loo yarayn lahaa qodobada wax burinaya, oo loogu roonaanayo kuwa salka ku haya, natiijooyin iyo waxqabadba; waana in ay isticmaasha, sida ugu badan ee suurta galka ah, nidaamyada caalamiga ee la aqbalay.

34.3 Faafinta Nidaamyada. Wasaaraddu waa in ay ku soo bandhigtaa nidaamyada ay soo rogtay, faafinta rasmiga ah.

Qodobka 35
Tilmaamaha

Marka loo sii raaciyo awoodda ay u leedahay bixinta tilmaamaha ee ku qeexan qaybaha 14.4 iyo 22.1.3, HBS, waxaa kaloo ay tilmaamo siin kartaa shakhsi ruqsad haysta, taasoo la xariita:

35.1 Arrin kasta, sida lagu cadeeyay qaybta 34.1; ama

35.2 Arrimo si kale waajib uga dhigaya, u hoggaansanaanta sharicigaan, xerarkiisa ama ruqsadda;

BAABKA VIII: QODOBADA CIQAABTA

Qodobka 36
Goobaha iyo Inta uu Saamaynayo Baabkaan

Qodobada baabkaan, iyadoo aan waxba loo dhimin, waxaa lagu fulinayaa dambiyada ciqaabeed iyo kuwa madaniga ah ee la xiriira guud ahaan sharciga.

Qodobka 37
Hawlgallada aan Ruqsadaysnayn

37.1Dembiga ka Yimaada Ruqsad la'aanta. Shakhsi kasta oo ku jira Hawlaha Batroolka, marka laga reebo kuwa haysta Ruqsad la baxshay, waxay mudan doonaan xabsi u dhexeeya saddex (3) bilood ilaa shan (5) sano ama ganaax u dhexeeya kun (USD $1,000.00) ilaa shan kun (USD $5,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah.

37.2Dembi culus. haddii dhibaatada loo gaystay Jamhuuriyadda Soomaaliya qiimaheedu gaarayo konton kun oo lacagta Maraykanka ah (USD $50,000.00) ama ka badan yahay, ciqaabta waxay noqonaysaa xabsi ka bilawda hal (1) sano ilaa siddeed (8) sanno ama ganaax u dhexeeya toban kun (USD $10,000.00) ilaa labo boqol oo kun (USD $200,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah.

Qodobka 38
Khatarta ku Imaan Karta Dadka, Hantida iyo Bii'adda

38.1 Dembiga Khatar galinta. Shakhsi kasta, oo ficil uu samaeeyey ka horimaanayo qodobada sharcigaan ama xeerarkiisa, halis ku galiya nafta ama jiritaanka kaamilnimada shakhsiga, wax yeelleeya hanti qiimaheedu sareeyo, ama dhib wayn u geysta bii'adda, waxaa lagu ciqaabayaa sida tan:

38.1.1 Xabsi ka bilowda hal (1) sano ilaa siddeed (8) sano ama ganaax u dhexeeya kun (USD $1,000.00) ilaa konton kun (USD $50,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah, haddii falka iyo abuurista khatartuba yihiin kuwo aan ulakac ahayn;

38.1.2 Xabsi ilaa shan (5) sano ama ganaax u dhexeeya shan kun (USD $5,000.00) ilaa boqol kun (USD $100,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah, haddii falku yahay mid ulakac ah, abuurista khatartuna tahay mid dhayalsi ku timid;

Qodobka 39
Carqaladaynta ku dhaqanka Awoodaha Kormeeraha

39.1 Dembiga Carqaladaynta. Shakhsi walba oo si toos ah ama dadban, ha joogo heer kasta ama ha u maro hab kasta, carqaladeeya, ama ku hoggaamiya shakhsi kale inuu carqaladayn ku kaco, si loo horistaago adeegsiga awoodaha iyo xuquuqaha uu leeyahay kormeerahu, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ka bilawda saddex (3) bilood ilaa affar (4) sanno ama ganaax u dhexeeya (USD $1,000.00) ilaa konton kun (USD $50,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah.

39.2 Isku Day Dambi. Isku day keenaya dacwo oogis run ah, loona hayo marag fur la xaqiijin karo, isna waa laysku ciqaabi karaa.

Qodobka 40
Warar Marin Habaabis ah

40.1 Dembiga Si Xun Wax u Sheegga. Shakhsi walboo:

40.1.1 Marka laga hadlayo, araajida Ruqsadaha ee hoos yimaada Sharcigaan iyo xeerarkiisa, oo si ulakac ah iyo xishood darro ah, u bixiya warar sidooduba ah been iyo marin habaabis; ama

40.1.2 Warbixin kasta, ama warcelin iyo qoraal dhaar wata, oo loo soo gudbiyo si waafaqsan Sharcigan, xeerarkiisa ama Ruqsad la baxshay, oo si ogaal ama xishood darro ah ugu soo dara ama ogolaada in lagu soo daro, war kasta oo sidiisuba ah been iyo marin habaabis;

Wuxuu la kumayaa xabsi dhan saddex (3) sano ama ganaax u dhexeeya kun (USD $1000.00) ilaa konton kun (USD $50,000.00) oo Dollarka Maraykanka ah.

40.2 Isku Day Dambi. Isku day keenaya dacwo oogis run ah, loona hayo marag fur la xaqiijin karo, isna waa laysku ciqaabi karaa.

Qodobka 41
U Hoggaansamid Darro Xeerarka ama Tilmaamaha

41.1 Dembiga u hoggaansamid la'aanta. Marka shaqsi qaban waayo ama dayaco inuu u hoggaansamo xeerarka iyo tilmaamaha ku kala cad Qodobada 34 iyo 35, ama sidoo kale uu ku hungoobo inuu u hoggaansamo qodob asaasi u ah Ruqsadda la baxshay, HBS waxay ku kici kartaa dhammaan iyo wax walba oo suurta galinaya, meel marinta shuruudaha nidaamka ama tilmaanta la doonayo fulintooda, iyadoo qiimaha iyo kharajkuba dusha laga saarayo shakhsiga ruqsadda haysta.

41.2 Go'aaminta Kharashka. Qiimaha iyo kharajyada ay gashay HBS ee ku tilmaaman Qaybta 41.1 oo u la jiro dulsaar oo ay Hay'addu (HBS) heer kiisa go'aamiso, waa dayn Dawladda u taagan.

41.3 Kharaj Celin. Iyadoo aan waxba loo dhimin waxyaabaha kaloo lagu leeyahay shakhsigaas, shakhsi walboo qaban waaya ama dayaca u hoggaansanaanta qodobka 34, iyo tilmaanta ku cad Qodobka 35, amaba ku hungooba u hoggaansanaanta shardi asaasi ah oo la xiriira Ruqsadda, wuxuu Soomaaliya u soo celinayaa kharaj la'eg, dhibka dhacay qiimihiisa, taasoo loo aanaynayo gudasho waaga waajibaadka, laayacaad, ama u hoggaansanaan la'aan.

Qodobka 42
Ciqaabaad Dheeri ah

42.1 Ciqaabaad siyaado ah. Iyadoo la eegayo dambiyada lagu tilmaamay Sharciga, ciqaabaadka dheeriga ah ee soo socda waa kuwo la isticmaali karo:

42.1.1 Ka joojin gaaban ee la xiriirta xaqa ka qaybgalka qandaraasyada guud oo ku saabsan hawlaha batroolka, khaas ahaan kuwa ku saabsan Ruqsadaha iyo keenista badeecadaha iyo adeegyada;

42.1.2 xayiraad lagu soo rogo hawl kastoo dhismo ku saabsan, marka ay dhacaan xaalado keenaya dhibaato aan ka kabasho lahayn oo ku timaadda danaha guud oo muuqan kara;

42.1.3 Hakin, oo ugu badnaan labo (2) sano gaaraysa, inuu qabto wax shaqo ah, haddii shakhsiga uu hal sano gudihiisa, ka horyimaado sharcigaan ama xeerarkiisa ama tilmaamihiisa kor ku xusan, laga bilaabo waqtiga xukunkii hore uu dhacay;

42.1.4 Joojin Ruqsadaha;

42.1.5 Shuruud dhaqan wanaag;

42.1.6 Ka joojin, xuquuqda kabitaan dhaqaale oo ay bixiyaan hay'addo guud ama kuwa adeegyada;

42.1.7 Faafinta xukunka; iyo/ama

42.1.8 Talaabooyin kale oo ka hortag ah oo loo arko in ay haboon yihiin, iyadoo la tixgalinayo xaaladaha markaa jira ee soo gudboonaada.

Qodobka 43
Masuuliyadda Ashkhaasta, Shirkadaha iyo Hay'adaha kale ee Qaanuuniga

43.1 **Masuuliyadda Hay'adaha iyo wakiiladooda. As**hkhaasta qaanuuniga ah, shirkadaha ama hay'adaha kale ee sharciga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan shakhsiyad sharciyeed lahayn, waxaa lagu soo oogi karaa ciqaab ku wajahan xadgudubyada lagu sheegay baabkaan, markay xadgudubyadaas galaan waaxyo ama wakiillo ka tirsan, iyagoo isticmaalaya magaca ay xambaarsan yihiin iyo danaha wada jirka ah ee ka dhaxeeya.

43.2 **Feejignaanta Isdifaaca.** Masuuliyadda dambiyeed waa la dhaafi karaa, haddii shakhsiga dambiga galay uu u dhaqmo, si bareer ah, ee waafaqsan, kuna beegan awaamirta iyo tusaalooyinka sida hagaagsan loo baxshay.

43.3 **Masuuliyadda Wakiilka.** Masuuliyadda hay'adaha ee lagu sheegay qaybta 43.1, kama baxsana masuuliyada shakhsiyadeed ay kala leeyihiin wakiilada.

43.4 **Masuuliyad wadareed iyo midda kali kaliga ah**. Hay'adaha lagu sheegay qaybta 43.1, waxay si wadajir ah ama kala gooni ah masuul uga yihiin, sida lagu sheegay sharciga madaniga ah, bixinta ganaax kasta ama magdhaw, ama fulinta waajibaadyada ka dhashay dhacdooyinka ama ka yimid arimaha ujeedada sharcigaani ka hadlayo.

Qodobka 44
Ganaaxyada Ashkhaasta, Shirkadaha iyo Hay'adaha kale ee Qaanuuniga

44.1 **Ganaaxyada.** Marka laga hadlayo, xaaladaha ashkhaasta sharciyeysan, shirkadaha ama hay'adaha kaloo qaanuuniga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan haysan shakhsiyad sharciyeed, heerka ganaaxu wuxuu noqonayaa hadba sida ay maxkamaddu goyso, iyadoo la tixgalinayo xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee shakhsiga sharciyeysan, shirkadda ama hay'adaha kale ee qaanuuniga ah, lana eegayo culayska iyo waxa ka imaan kara fal dambiyeedka.

44.2 **Wax ku Lahaanshaha Raasumaalka.** Haddii ganaaxa lagu fuliyo hay'ad aan la hayn shakhsiyad sharciyeed, bixinta ganaaxaas waxaa dusha laga saarayaa raasumaalka Hay'adaasi; haddayse, uusan jirin raasumaalkaasi ama uu ka hooseeyo heerka koboca loo baahan yahay, waxay bixintu dushiisa tahay, wadar ahaan ama kali kali, rasumaalka mid kasta oo shirkadda ka mid ah.

Qodobka 45
Kormeeridda

Hay'adda (HBS) iyo kormeeraha, sidoo kale, waaxyada ka midka ah maamulka guud oo loo wakiishay hawlaha kormeerka, sida ku cad sharciga iyo xeerarkiisa, waxay masuul ka yihiin in ay sugaan, sidii kormeerku ugu dhici lahaa, si waafaqsan qodobada sharcigaan ama xeerarkiisa.

Qodobka 46
Fulinta Xukun ka Baxsan Nidaam Maxkamadeed

Iyadoo looga dan leeyahay soo uruurinta khasabka ah, sida sharciga guud sheegayo, caddayn ay soo saartay HBS oo la xariirta dayn jirta, ama lacag la leeyahay, sida ay dhigayaan ku dhaqanka qodobada sharcigaan ama xeerarkiisa, oo aan la bixin waqtigii ku haboonaa oo ay HBS horay u cayintay, laguna ogaysiinayo qoraal ahaan shakhsiga deynta qaba, waxay keenaysaa fulin xukun ka baxsan nidaam maxkamadeedka.

Qodobka 47
Sharciyada Lamaanka ah

47.1 Ciqaabaha iyo Sharciyada kale. Sharciga guud ee ciqaabaha, iyo wixii la midka ah eek u saabsan sharciyada maamulka iyo madaniga ee muhiimka ah ee Soomaaliya, waa kuwo loo fulin karo si lamaan ah oo bar-bar socod ah, lehna is waafajinta loo baahan yahay, si loo dabbaqo qodobada baabkan ku soo arooray.

47.2 Diidmo Iskahorimaad. Marka ay dhacdo in qodobada sharciyada kaloo Soomaliya ay ka horyimaadaan qodobada Sharcigaan ama Xeerarkiisa, kuwaasi waxay noqonayaan kuwa aan waxba ka jirin, markay timaado ku dhaqankooda Hawlaha Batroolka.

BAABKA IX: QODABADA GUNAANADKA AH IYO KUWO KALE

Qodobka 48
Qodobka Ku Meelgaarka ah

48.1 Bixinnadii Hore. Iyadoo haysata ogolahaansha Dawladda, Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeerar caddaynaya hab maamuleedka ay raacayaan, iyo sidoo kale waajibaadyada laga rabo, ashkhaasta ka mid ahaa ama ku jira Hawlaha Batroolka ee la xiriira qandaraasyadii hore oo muujinaya xuquuq ay bixisay Jamhuuriyaddii Dimoqraadiga ee Soomaaliya, 30ka bishii Disember, 1990, ama ka hor, kuwaas oo loola jeedo bixinnadii hore. Xeerarkaas waa in ay ku jiraan qodobada soo socda:

48.1.1 Qandaraasle hore, wuxuu xaq u leeyahay inuu u rogo heshiiskiisii hore qaab Ruqsadeed la mid ah bixinnadii hore. Heshiiskii hore oo lahaa qaab ku dhaqan kaliya (Concession) oo siinayey qandaraaslihii hore inuu kaligii sameeyo hawlaha batroolka waxaa loogu badalayaa heshiis leh qaab Wax-Soosaar Wadaag. Qandaraasle hore oo raba inuu badalo heshiiskiisii hore waa inuu:

48.1.1.1 Siiyaa Wasaaradda:

48.1.1.1.1 Nuqul dhab ah oo sheegaya wixii uu ka qabtay

heshiiskii hore;

48.1.1.1.2 Caddayn raali laga noqon karo, oo muujinaysa in arrinku dhacay bishii Disember 30da, 1990, sheegayana inuu si buuxda ugu hoggansamay waajibaadyadii ku qeexnaa bixinnaddii hore;

48.1.1.1.3 Nuqulka diiwaanka hawlgalka, si waafaqsan heshiiskii hore, oo ay ku jirto ka tegista qayb uun ka mid ah goobtii Ruqsadda ee bixintii hore;

48.1.1.1.4 Nuqul la xiriira dhammaan macluumaadkii iyo wararkii ku caddaa heshiiskii hore ee loo baahnaa in loo soo gudbiyo Dawladda;

48.1.1.1.5 Caddaynta dhinacyada wali ku jira heshiiskii hore, iyo sida ay dhinacyadaasi u hanteen dantoodii la xiriirtay heshiiskii hore, oo ay ka dhaxleen qolooyinkii assal ahaan u haystay bixintii hore.

48.1.1.2 **O**golaado in kala furfurista waajibaadka ku cad Ruqsadda cusub, ayna ka mid noqotaa kala daadinta shaqooyinkiisii uu horay u qabtay, iyadoo la raacayo heshiiskii hore.

48.1.1.3 Ogolaado shuruudaha Ruqsadda cusub oo dhextiilay qandaraaslihii hore iyo Wasaaradda, waqti, ama ka hor, taariikh ay Wasaaraddu cayintay, kaasoo aan ka dambaynaynin taariikhda lagu sheegay qaybta 48.2.

48.1.2 Ruqsad hoos timaada qaybta 48.1.1.3 waa in ay la socotaa mabaadi'da Sharcigaan, Xeerarkiisa iyo qaabka Qandaraaska ay faafisay Hay'adda (HBS), lana xariirta qaybta 8.20.5.

48.2Dadaalka Wada Xiriirka.Wasaaraddu waa in ay samaysaa dadaalo macquul ah si ay ula xariirto shakhsi kasta oo horay Qandaraas u haystay, si ay ugu suurtagasho in ay ogaato kuwa ay yihiin, si ay talo uga siiso xuquuqdooda ku cad qaybta 48.1. Markay soo baxdo in hal Heshiis oo Hore ay kuwada jireen in ka badan hal shakhsi, Wasaaraddu waxay u baahantahay oo kaliya in ay samayso dadaal macquul ah oo ay kula xiriirto shakhsiga ugu muuqda Wasaaradda in uu yahay Shaqo wade. Ma jiro qandarasle hore oo sideedaba xaq u yeelan kara inuu Wasaaradda ama Dawladda ku eedeeyo gaabis loo aanaynayo in Wasaaraddu u suurta galiwayday fulinta qaybtaan 48.2.

48.3 Waqtiga uu Dhamaanayo kala Badalku. Haddii Heshiiskii Hore aan loo badalin Heshiis Wax-Soosaar Wadag oo hoos yimaada Sharcigaan sida ku cad qodobada qaybta 48.1, sanad guurada kowaad markuu Sharcigaani dhaqangalo, markaas:

48.3.1 Heshiiskii hore waa la joojinayaa, wuxuuna noqonayaa waajibaad aan Dawladdu ku khasbanayn inay isku laasimiso, marka la gaaro sanad guurada kowaad ee Sharcigaani Dhaqan galo;

48.3.2 Dawladdu masuul kama aha wax kastoo khasaare, kharash, qaan sheegasho ama wax dhibaal ah oo ka yimaada joojinta heshiiskii hore; iyo

48.3.3 Dawladdu, ka Qaran ahaan, waxay xaq u leedahay in ay ku dhawaaqdo in aan sinnaba loogu qabsan karin arrin ka timid qandarasle hore oo ku saabsan joojinta heshiiskii hore.

48.4 Heshiisyadii 1990kii ka dambeeyey. Laga bilaabo taariikhda sharcigaani dhaqangalo:

48.4.1 Xuq walboo lagu fulinaayey hawlgalada batroolka oo ljiray ka hor Disember 30dii, 1990kii, waa la joojinayaa, waxayna noqonayaan waajibaad aan Dawladdu ku khasbanayn inay dhawrto;

48.4.2 Dawladdu masuul kama aha waxkastoo khasaare, kharash, qaan sheegasho ama wax dhibaal ah oo ka yimaada joojinta caynkaas oo kale; iyo

48.4.3 Dawladdu, ka Qaran ahaan, waxay xaq u leedahay in ay ku dhawaaqdo in aan sinnaba loogu qabsan karin arrin uu soo bandhigay shakhsi, loolana jeedo joojinta xaqqa noocaas oo kale ah.

Qodobka 49
Dhaqangalka Sharcigaan

Sharcigaani wuxuu dhaqan galayaa, awoodna yeelanayaa, kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa ansixiyey, **Barlamaanka Federaalka Kumeelgaarka** ah ee Soomaaliya.

Waxaa ogolaaday, Madax-waynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya,
Md. **Cabduullaahi Yuusuf Axmed**.